# TALADAAN LA RUUGIN WAA LAGU RAFAADAA



W.Q. Cabdicasiis Xasan Yacquub
(Baab - Rakhiis)

TALADAAN LA RUUGIN
WAA LAGU RAFAADAA

★★ 'LAMA DAABACAN KARO IDIN LA'AANTA QORAHA' ★★

1985

# TALADAAN LA RUUGIN
# WAA LAGU RAFAADAA

W. Q. Cabdicasiis Xasan Yacquub
(Baab - Rakhiis)

**HIBEYN**

★★ Maalmaha kuwaa ay ka maroreen ★★
Muraayadda sabankuna caashaqoodii ★★
Ka muuqdo ★★

Dunida oo habeen ah, gudcur mugdi ahina uu jiro, dayaxii maqan yahay, xiddigo daateen, ayey Deeqa sida qof bahal qaniinay ka baraarugtay hurdadii, waxay ka soo boodday sariirtii ay ku jiiftay ... dhidid baa shax ka lahaa, jirkeedii mar qura wada qooyey .. ilmo ayaa ku joogay indhaheedii la moodayey baro dhiig ah sidood.
Amakaab, ashqaraar, argagax ayaa gabigeedaba saaqsanaa, baqdin iyo feker ayey kala soo baxday qolkii ay ku jidhay.
Daruufo hore oo soo maray ayaa ku soo dhacay, waxaase marba dejinayey qiso kalgacal sare iyo jaceyl dhidib aastey oo kaga daba maray. Xoor laga dhamay xagaayadii iyo xasuus baa geelaba lagu xero geeyaaye. waxay ka heleysay ileys weyn.
Dadkaa badan ee dhulka ku caddiban awgoodna talo ayan ruugin la rafaaday ilmadu sidii roobkii ugu soo daadanayeen dhabannadeedii sida mareerta cas ahaa.
Adduunyoy xaalkaa ba'. Hillaac ayaa meel walba ka dhacay, onkodku daba xigsanayey.. Gamadiid oo ninkeeda ah safar ayuu ku maqnaa.. ruux kale cidladaa kuma wehlin iyada iyo wiilkeeda labo jirka ahaa.
Waxay ku dhawaaqeysay erayo ay ka mid ahaayeen; weynow ilaah, waaxidkii adkaa, wehel kii u roonaa, lama degaankaa cidlada ah kii waaddiyo naruuro leh iyo webiyada ka jeexow. allow dadkaa kaal, kadeedka xilliga iyo kana qaad kabadda saban.
Aadanahu waa miskiin, garashadiisu kooban, noloshiisu dhibo taxan, waxay oo qura ka kala fududaan, kolkuu helo qofay is af gartaan, cidlada iska kaashan lahaayeen, dhibka wada qaybsadaan, noloshu cusbo ma leh, haddaadan helin qofkii aad ka dugaashan laheyd, xidhiidh macaan aad kala gali laheyd, nafsaddaadu ay ku diirsan laheyd, caqligaagu ku degi lahaa, dareemadaaduna qabow iyo neecaaw janno ka heli lahaayeen.
Qof walibana waa inuu ku dadaalo sidii nolol deggan farxaddu udubbadeed tahay uu ku sameysan lahaa ... jillaafooyin badan way kula soo gudboonaan .. Waa sunnada nolosha .. ha yeeshee waa inaad la dagaashaa, la dirirtaaa, dab naar iyo olol kala hor tagtaa samir iyo dulqaad, samaantuna waa dhaxalkii aad heli laheyd.



Deeqa xusuus baa dilooneysay, iyo waayo soo maray gaar ahaan goortay garaadsatay. Waxay dib u laabatay sanooyin deyrtii sannadkii 1974tii, waxay aheyd maalin Sabti, saacaduna 9.00 aroornimo kolkay ku soo kacday cod naxariis badan oo ku leh:-

- Hooyo, miyaadan ogeyn in maanta la soo saari doono imtixaankii dugsiyada sare?
- Haa, Hooyo macaan haddaan is diyaarin.

Deeqa diyaar bay aheyd muddo gaaban gudaheed, waxaa ku jiray shacuur isugu dhafan baqdin iyo ididdiillo, niyad subaxaa quraac uma ayan heyn.. waxaa u yimi dhowr gabdhood ay saaxiib ahaayeen, gurigana ka wada tageen iyadoo mid waliba moog tahay go 'aanka guddiga imtixaanaadka, waxa uu noqon doono. dadaalkii badan baa daruuraha kaa sare mariyee, Deeqa waxay noqotay gabadhii ugu dhibco badneyd sannadkaa dalka oo idil.

Farxaddeedu kolkaa qiyaas ma laheyn, waxayna habeenkii dhigatay xaflad kulan yar aheyd ay asxaabteedii keek iyo kooka ka dibbireen.

Waxay arji u qorotay Shirkaddaa Dayuuradaha Soomaaliyeed. Dalabkeeda waxaa lagu xarribay soo dhoweyn sare iyo daneyn gaar ah. waxay aheyd fursad dahab ah in door ahina ay shirkaddu raadineysay gabar tilmaamahaa leh, quruxda tusaale wacan u ah, asluubta wanaagsan masal la daliilsadaa,

Waxaase arrintaas ku diiday aabbaheed, wuuse ka noqday kalsooni uu ku qabo iyo afadiis oo dagaal qabow ka deyn weyday. ma ayan dooneyn in gabadhaa curadka u ah ay qalbi jabiyaan, balse qabeen inay thay waajib saaran in waddadaa ay dooratay ay u ifiyaan.

Deeqa oggolaanshaha reerka macno iyo nolol gaar ah bay xaggeeda ka laheyd.

Gabar maarriin casaan xigeen ah, aragti macaan leh, indho sidii birlabta ku soo jiidan, timo dhuxul ah, dherer iyo lixaad, labadeeda indhood waxaa ka muuqda ileys garasho iyo garaad dhan, eegmadeeduna cinwaan loogu hagaago aragtida fog iyo naxariista kalgacal, labadeeda dibnood casaan toolmoon xaqa aan ka weecan, xishoodkana wehelsada, jabhaddeeda hore, joogga iyo jamaalka duruus jariiracyo leh jaliil dugsiga quruxda ka dhigay.

Waxay aheyd Deeqa oo lagu tilmaami jiray cadceed dumar iyo ragba

cawirta kana yeesha sida baraf milicda loo dhigay. waxaa iyadoo qolkeeda ku jirta soo gaarayey qosol yar yar iyo sheeko ka dhaxeysay labadii dhalay iyo labo dhiggood ah. Wanaagsanaa kuwii is aaminoo dan iyo ujeeddo gaaban ayan walaaleyn, kuwii aan is illoobeyn, balse maalin walba xiisaha ay isu qabaan kuleyl iyo koror siyaadsado, kuwii daacad isku doorta, is daryeelana daáin iyo abad.

Waxay jecleystay ruux sidaa ah, oo ay u hibeyso nolosheeda, isku degaan, raaxo ku wada noolaadaan.

afkaarta noocaa ah iyadoo ku jidha riyooyin kuwaa eyligood ahna dhex dabaalaneysa baa waxaa ka kala gooyey oo halkoodii ku hakiyey labadii ka yaraa Shaafici iyo Yoonis Yare oo markaa dugsiga ka yimi.

Waxay ka wareysteen kolkay howsha bilaabi doonto waxayna u sheegtay in toddobaad kaddib 3 bilood oo tababar ah Qaahira loogu diri doono. Kala fogaanshaha iyo muddadaas gaaban ee is arag la'aanta reerka oo idil baa ka wada xumaa, waxayna u arkeen ceeryaamo iyo daruur cirkoodii qarisay, waayo waxay u aheyd sida roobkaa da'ee nolosha hillaaca. Dhowr cisho kaddib ayey waxay diyaarsatay wax allaale iyo waxay la safar geli laheyd, maalin Axad ah bayna ka dhooftay garoonka weyn ee Muqdisho. Ilmo ayaa indhaheeda ka daadanyey isugu jiray farxad, baqdin, xiiso, iyo doonis.

Waxaa sii sagootiyey reerka oo idil, iyagoo ilaah kaga baryaya safar salaama iyo soo noqod wanaagsan. waxay Qaahira ku maqneyd seddex bilood, ay ku soo dhigatay hab soorka, iyo daruus la xiriirta gurmadka degdegga ah.

Way ka soo laabatay tababarkii ay aadday. waxay maalmo xoogaa ah dabadood si dhab ah u dhex geli doontaa dabiicadda howsha ay sagaal jir ku caashaqday.. baqdin baa ku jidhay fara badan, shaqadii ayey billowday, socdaallo dhowr ah gashay waxay aad ay u ishaa faleysay habka howsha tahay, muddo gaaban gudahood beyna kula qabsatay. maalmo iyo bilo yar dabadood Deeqa waxay aheyd gabadha keliya ee shirkaddu ku faanto, dabci wanaagsanaan iyo isku darsatay firfircoonaan. waxay aheyd misaal howl samaan.

Deeqa waxay ka kasbatay dhulalkii kala duwanaa ay booqatay, shacuubtii kala geddisanaa ay aragtey, dhaqammada kala ceynka ah ilbaxnimo sare. waxay jecleyd kheyrka, samaha, hadalkana u wanaajin jirtay qof kasta darajadiisu intay doonto ha ahaatee. xin, xumo, xan waddo ay u soo maraan inantaa ma ayan helin. qof kastaa higso ayuu is



oran jiray oo yaqaan iyada.

Waxay ilaah ka baryi jidhay sida ay ku heli laheyd ruux afgarad wacan leh, aragti qudh ah wadaagaan.

Waxaa dhibaato weyn ku ahaa quruxda sare ee eebbe ku manneystay raggii keentay inay ku dhiirran waayaan, badankoodna ka gabbadaan. Nin waliba markuu arko gabadhaa sida tufaaxa cas ah; milicsado calaacalaheeda carfaya; kubku aad culumada mooddo; kubku culus; cabbaadyaha camiran; cunaha meeshooda; timaha casaanka iyo madowga labada caynood leh buu dhalaali sida subag sixin ahoo muddo dabka looga tagey. hadal iyo dabuubti; Deeqa waxay baadi goobeysay ruux nadiif ah, nolosha macnaheed yaqaan. ma dooneyn cunug xun intuu shaar iyo surwaal ku habboon qaatay, Shabeelle been iyo ku tiri ku teen la joogsaday. waxay dooneysay ruux nidir u gala nolosheeda; qalbigeedana noog iyo nitaaqo ka dhawra; iyaduna jaceyl dhab ah u hibeyso; cishqi aan gurin; xishood afannimo iyo xurmad aan dhammaan.


Waxay aheyd maalin Isniin ah, ceeryaamo ayaa gebi ahaan qarisay gegida dayuuradaha ee magaalada Frankfort, duuliyihiina awood uma yeelan inuu ka dego garoonka caasumaddaa weyn aragga oo xumaaday awgeed, waxay qalabka isgaarsiinta fadhay inuu ku dago gegida dayuuradaha ee magaalada Muunikh, kolkay diyaaraddu caga dhigatay waxay saacaddu cagacageynaysay 3:30 galabnimo. Waxaa rakaabkii la dajiyey Hoteel u dhowaa gegidaa.

Deeqa waxay ka codsatay Luul oo shaqada kaga soo horreysay inay wehel u noqoto si ay hadiyado asxaabta iyo ehelada ugu iibiso, isla markaana kaga bogato indhaha mariso bilicda iyo quruxda dabeecadda magaaladaasi, Luul ma fulin kareen codsigaasi xanuun madaxoo hayey awgeed, taas oo keentay inay Deeqa tashataa keligeed, waxay taleefon ku qabsatay Hoteel ku yiil tuulo sagaashan kiilo mitir u jirta halkaasi; magaaladaasi oo dalxiiska iyo qalabka hadiyadaha ku caan baxday. Taksiyada garoonkaa mid ka mid ah ayey u kireystay, saacadda uu socdayna waxay Deeqa aad ula yaabtay, cajab galiyey, u cuntamay carafta iyo udugga dhirta, saxansaxada hawada, cagaarka doogga, khudradda iyo miraha waddada hareereysay.

War uma heen wagtiga ay tuulada timi, waxay ku baraarugtay darawalkii oo ku leh; waynu joognaa hoteelkii. gaarigii ayey iska fasaxday, qolkii ay

hoteelka ku laheyd abaartay, durba intey dhar beddelatay, muraayado ku habboon qaadatay u dhaadhacday magaaladii.. waxay socotaba waxay ku timi buur dheer oo dad aan yareyn u soo dalxiis tageen.
Deeqa oo la dhacsan abuurkaa ilaahey ayaa waxaa ku kediyey sowd gibin ah oo naxariis iyo macaan lagu dheehay, inan af Jarmal kula hadlaya.. cajabay.. cajab, marna kama ayan weecin labadeeda indhood, indhahiisa ay ka baxayeen biriq la mid ah tii gu'gii ka dambeysay abaartii baastaley. muuqaalka iyo midabka inanka waa Soomaali ayaad is oran. kaddib bey waxay ugu warcelisay af ingiliisi:-
- Waan ka xumahay, kuma hadli karo af Jarmalka.
- Iga raalli ahow, waxaan kuu qaatay ardayda wax ku barata dalkan.
- May, ma ahi
- Xaggaad ka timi?
- Soomaaliya
- Ku soo dhowow Germany, waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ogaado qiimiga iyo qaayaha hablaha Soomaaliyeed.
- Waan kaaga mahad celin shacuurtaa wanaagsan.
Waxuu dabeeto weydiiyey waxay ka qabto inuu u wehel yeelo, tuse iyo turjumaan intaba isagu noqdo.
- Waxba kama qabo, Deeqa ayaa ugu warcelisay.
Buurtii ayey wada koreen, mise doog xad aan laheynoo indhahii daallan nasiino iyo nasteexo ay ka helayaan, xareedduna dhinac walba waran tahay, beer caqligii dayeysan dowga toosan ku duwi, boqollaal ceynood oo ubax ahi, qaybba meel tahay, intaba yaan la illoobin leeyihiin awoodda ilaah iyo quwaddiisa sare. waxuu iska xilsaaray inankii, inuu tusaa goob waliba oo taariikh leh, warbixin iyo faallo ka siiyo, isagoo ugu sharxaya afka ingiliisiga. Deeqa waxay ka ballan qaadday hadduu Soomaaliya yimaado oo isaga xaggiisa riyo ka aheyd ay iyana geyn doonto meel daawashada iyo dalxiiska ku habboon.
Aad ayey ula dhacday Deeqa asluubta wacani, aqoonta fog, hadalka macaan, xurmadda iyo xushmadda inanka, intii yareyd ay wada jireen, qalbigeeda ayaa waxuu ka qaaday sawir wacan oo xasuus leh: inan maariin ah, dheer, xooggan dhabar weyn, timihiisu dhalaalayaan, indhahiisu ileys dhiigayaan, iyo shucaac dhowr midab isugu jira..
Sheekada aad ayey isugu baxeysay, ninkii arkaa wuxuu moodi lahaa sida dad qarniyaal is yiqiin, waqtiga ma ayan dareemeyn.
Waxuu war-bixin ka siiyey nooca howshiisa tahay, iyo wax walba oo la





xiriiray noloshiisii hore.. in illaa iyo hadda uusan garaneyn, meeleyn la'yahayna halka asalkiisu uu gali, waxaan ku indha qaatay ayuu ku yiri aabbe la'aan, kolkaan hooyadey weydiiyana, waxay iga codsataa inaan ka cafiyo weydiimahaa. waxaanse dareemi inay sir jidho sida aan ku heli lahaana aan garaneyn, waxaan ahay geed cidla'ka baxay.
Deeqa oo aad ugu faraxsan isbarasho dhaxal gal oo dhex martaa inankaa qalbigiisii oo idil u furay baa waxay weydiisay markaa:
- Magacaa fadlan?
- Werenbag adna?
- Qaali
Baarka weyn ee 'La Shangrila' ayey wada tageen, waxuu ku casumay casho sare, waxuuna ka codsaday inay ku darsato labo, seddex cisho booqashadeeda, si eheladiisa oo idil uu u baro, weyse ku cudurdaaratay una sheegtay fursad inay ka heysato 30 daqiiqado oo qura, kaddibna gegida laga doonayo, inay soorto ka tahay Shirkadda Dayuuradaha Soomaliyeed.
Buunkii Aakhiro sida uu dhacay ayey mar qura xaaddiisii wada joogsatay, dhaqaaq iska waayey, wareer daran dareemay, waxuu is weydiiyey xeyskii uu is yiri wuu kuu di'i, waxa xagaayada xun iyo jiilaalka ka dabamarshay, saacadahii farxadda aheyd warkaa madow.. barshadeeda wuu ku bishaareystay, se waxay nafsaddu doontaba miyey heshaa?!
gegedii dayuuradaha ayuu u soo qaaday, halkaas oo uu ku gaddoon siiyey hadiyad sharaf iyo xasuus mudan, qeymo galna ah, iyana waxay u hibeysay buug dadka iyo dalka Soomaaliyeed ka hadlaya.. kaddibna is gacan qaadeen.

Deeqaa xaggii diyaaradda u jiheysatay, iyadoo ka fekereysa qisadaa la yaabka leh iyo in ninkaa uu Soomaali noqon karo sida uu damiirkeeda u sheegi. Werenbagna inta ay ishiisu heysay Deeqa iyo kolkay libiqdayba wuu gacan haadinayey isagoo ku leh af Jarmal cod weyn sida ruux markaa Laasareeti ka soo baxsaday :-
Jaaw Nabad Gelyo
Jaaw Nabad Gelyo
Diyaaraddii ayaa caga qaadatey, iyadoo ku sii socoto magaalada 'Rome' kaddibna waxay u soo Shiraacatay magaalada sharafta iyo qaddarinta mudan ee Muqdisho.



Sida caadadu aheyd iyo si ka fiican ayey Deeqa u gudaneysay xilkii ka saarnaa rikaabka, illaa ay ku nabad yimaadeen Muqdisha magaalada keliya ee ku weyn qalbigeeda, milicsigeedana ay ka hesho iyo hawadeeda macaan, ha yeeshee joogisteeda ay ku yaraatay, berrito waa u socod hor leh iyo safar Jeddah, aad bey ugu faraxsaneyd in eheladeedii ay la kulanto, hasaawo, iyo sheekooyin dhex maraan, aad beyna uga xumeyd inay isla berri ka duushaa iyadoo aan ka bogan.
Deeqa waxaa u qaaday gurigeeda gaari ay shirkaddu laheyd, waxaana lagu soo dhoweeyey si xamaasad, jaceyl iyo kalgacal lagu subkay.
Waxay kaga qisootay reerka siday u aragtey dalka Jarmalka, sheekadii yaabka ku abuurty inankii ay kulmeen, Soomaaligana la moodayey. dabadeedtana waxay qaybisay hadiyadihii ay qoyska ugu soo talagashay ahaana kuwo ay dooqooda ku saleysay.
Farxaddaa ayaa lagu wada ciiday, laguna wada seexday, Deeqase waxuu maankeeda ku howlanaa shacuur ku jidhay lana xiriirtay inankii ay Jarmalka ku aragtey iyo sida uusan Soomaalida kaga fogeyn, firna ugu galeen sida uu qalbigeeda leeyahay.

Salaaddii hore ayey Deeqa kacday, shaqadeedii isu diyaarisay, waxaana garoonka u soo qaaday oo keenay aabbaheed.
Deeqa waxay ku dhex jidhay asxaabteeda shaqada, ka fakareysayna waayaha adduunka, iyo halxiraalahooda, baddaa iyada oo ku jidha waxaa ku kediyey qoladii ay la jidhay oo mar wada kacday, si xammaasad lehna u soo dhoweynayaan inan ayan garan waxa uu yahay iyo meel uu ka yimidba, waxayse aad ula yaabtay sida ay u xilqaamayaan iyo inta ay gaarsiisan tahay soo dhoweyntooda, sida uu ruux waliba isugu dayayo uguna dadaalayo sidii uu u kasban lahaa kalsoonidiisa..
Deeqa ayuu gacan qaaday isagoo leh :-
- Waa gabadha cusub baan fili, Dayib baa la yiraahdaa haddaan iskaa baro
Deeqa ayaa waxay ugu warcelisay si kooban:-
- Barasho wanaagsan.
Dayib inan dheer, dhuuban, shaarab iyo gar isku go'an leh, soddonkii ku dhowdhow, waxaa ka kala jaray hadalkiisii maykarafoonka oo ugu baaqay rikaabkii diyaaraddaa ku qornaa inay soo xaroodaan, Dayibna uu ka mid ahaa. Dayib waa ka caan shirkadda oo idil socdaalladiisa xagga ganacsiga oo badan. Waxay nafsaddiisu aad ula dhacday inantaa,

waxuuna go'aan ku gaaray inuu bartaa wax kastaba ha ku qaadatee, kuna dadaalo sida cambaruugtaa bislaatey ku miro goosan lahaa.
Intey diyaaraddu socotay ayuu waxuu diyaarshay qoraal aad u dheer oo uu ku qiray inuu ka helay, tahayna tariig hir doog leh ka baxday, hoobaan bislaatay kii camoole ahi uu ku indha dillaacsan, qalbigii bukaa ku dawoobi ileyskii guducurka lagu iftiinsan lahaa, kana codsaday inayan ka bakheylin sharafta barashadeeda. Dayib waxuu ku dadaalay siduu gabadhaa u mulkin lahaa, xiriirna ula geli lahaa, dhinacyo kala duwan iyo asxaab ay laheyd xaggood ka soo galay.
Muddo ayaa wacdi iyo daruus loo hayey, si jaceyl xaggiisa ah qalbigeeda looga abuuro, waxay Deeqase ku oran jidhay ninkaan ragga ka doonayo malyankii mid baa ku jira, waxaan fili inayan arrintaa aheyn mid fudud deg degna ayan u baahneyn, kaadsigeedana kiishash lacag la siisan.

Waxay aheyd maalin Arbaca ah, hawada Xamarna meel dhexaad, qabow xaggiis u janjeerta, waxaa ay mareysay Baar Shabeelle meel u dhow, waxaa halkaa ay ku kulmeen Dayib. Deeqa waxay fasax dhowr cisho ah ka heysatay xagga shaqada. waxaa dhaceysay leydh qabow. guuxii dadka, iyo sawaxanka gawaarida awgeed ayey waxay Deeqa gocatay bal inay baarto oo ay u kuur gasho sirta nolosha iyo waxay tahay, habeen iyo dharaar waxay aadanahu u ordayaan, khaatimadu siday noqon, sida Transit loogu wada yahay adduunka, been iyo dhalanteed waxa laysku maaweeliyo.
mashaakillo, mas'uuliyado, qosol, rajo, quusasho, tan iyo intaad ka soo gaareyso joogsiga aad kaga degi laheyd baska adduunka, adoo ka xun inkastoo buux dhaaf ahaa cidhiidhi miiran, mid hargab iyo cabbur laga qaado.. kolay baddaa ku haftay Dayib baa waxuu su, aalay, waxa loo waayey, halka ay gashay, waxay u sheegtay inay fasax dhowr maalmood ah qaadatay. waxaa uu ka wareystay sida ay waqtiga isu dhaafiso, waxyaabaha ay xiiseyso, mid walibana waxaa ay ka siisay jawaab iyo faallo dhan, dabeeto saacadda oo yari orodday awgeed. ammin dambe oy gaadhay, ku ballameen isla baarka maalin kaddib...
Maalintii ayaa la dheeratay Deeqa, wey dharareysay, cishqi ayaa ka maqan, murugo iyo ciil geyisiiyey..
tolowse ma laga yaabaa in adduunkan laba labada ah gabadhaa ka kelida ah xabiibka iyo gacalka li'i inuu u wehel noqda cidla'da ka saaro?
Nin baa waxaa laga sheegay inay marti ku soo hoyatey, kolkaasey ku



yiraahdeen:
- adeer magacaa ?
- markaas buu yiri :
- Looge
waxay ugu warceliyeen
- loo Joogee

Dayax shan iyo tobnaad, durduro hirar, hawo caafimaad, dabeyl roobaad, cimilo sidee ah bey hawada siinayaan?
xilligoo sidaa ah bay Deeqa iyo Dayib intay dhexda is qabsadeen daymo kalgacal iskula dhaqaaqeen, si diirraan dabeeto ugu wada sheekeysteen amuuraha adduunka jira kuwo gaar iyo kuwo guudba.
Kaddib markay ka daaleen ku socodka xeebta waxay ku soo laabteen baarka, casho caafimaad qaateen.
Cabbaar wax la kala aammusnaado ayaa waxaa hadalkii furay Dayib isagoo leh:
- Deeqa kolley hadda is dhexgalnay, aadna intii hore isaga soo dhowaannay, arrimo waaweynna weynu iska damacsannahay sidaa awgeed waxay iila muuqataa in lagama maarmaan tahay inaan kaaga warramo warbixin buuxdana kaa siiyo nolosheyda hore.. Sidaa ayuu dacal ugu qabtay taariikhdii hore ee noloshiisa.
Waxuu daaha kaga qaaday arrin cusub, qiso jidhay, Deeqase ka qarsooneyd. waxuu u sheegay in lagaga horreeyey, oo uu leeyahay laba ilmood..
Sidii uu nabar xun ku dhacay bay Deeqa nuuxsi iska weyday, hadalkii ka soo bixi waayey, waxay moodeysay sideeda oo kale, waxay damacday inay oraah tiraahdo, fursadse ma siinoo intuu hadalkii ka boobay, baryo iyo eed sheegad kula dhaqaaqay..waxaana ka mid ahaa erayadiisa:-
- ma rajeynayo inay arrintan xiriirkayaga saamayn kadho, mana qabo in baaruudda qaraxda tan u daran ay ina kala dili kadho .. Deeqa waxaa wax walba ka weyn i indha tiraya xubbiga aan kuu hayo, sabab ha u noqon inaad adduunka ka waddo amaba silic aad u horseeddo ruux jaceyl daran kuu haya.. waan ku jeclahay badaha.. webiyada .. buuraha qaddarkood ee naxariis u gal naftan kuu oomman, dhinac kale raalli kama aheyn gabadhaasi xigtada. aynu aheyn, layguna qasbay.. calaacal.. catow.. baroor buu ka bixi waayey.
Dadkii baarka joogay ayaa wada yaabay, waxaa lays weydiiyey war miyey



sixidhay gabadhu inanka?
Wax lala yaabase ma aheyn, waayo labadeeda indhood ee qudh ah ninkii arkaa baa waxuu noqon sida sarqaan khamri sagaal iyo toban qarsho ka cabbay..
Waxay Deeqa gunaanadka hadalka iyo cabaadkii Dayib ku soo koobtey inay ka fiirsan doonto arrintiisa, una kuur geli doonta hadduu u noqon karayo nin.
sidaa buu ku soo qaaday, kuna keenay gurigeedii, waxuu ka rajeeyey kolkuu gacan qaadayey inay arrintaa u eegto si raxmad iyo naxariis leh.
Deeqa habeenkaa labo indhood isuma keenin, feker dheer dabadi waxay, go'aan ku gaadhay, laabteedii gaddoomisay inay israacsiin xubbiga u hoggaansamin.. su'aashuse waxaa aheyd midab sidee ah bey berrito cadceeddu ugu soo bixi?....

Waxay aheyd siddeedii aroornimo, kolkay Deeqa ku soo kacday dhawaq dheer oo ka soo yeedhay adeegtadoodiii Duniya, debadda ayey qolkeedii kaga soo baxday siday u eegto waxa dhacay, mise Duniya baa dhulka taal, sankuna dhiigi
Intey Deeqa naxday bey af labadi yeertay oy tirina :-
- all amaxaa kugu dhacay Duniya ?
- alla walaaley waan kufay..
Deeqa iyadoo la kaashaneysa aqoonta gargaarka hore bay waxay ku guuleysatay inay joojiso socodka dhiiggii.
Waxay kaddib fadhay inay is dhowrtaa, dhaqdhaqaaq sameyn , tan iyo inta ay Dhaqtar kaga keeneyso...
Goor duhurnimo ah bay keentay Dhakhtarkii.. haa.. ma ayan illoobin inkastoo arrimo badan oo ayan garaneyn maankeed ka dhex hadlayeen.

Sannad iyo bar baa orod iyo xiin ku dhaafay Deeqa da'deediina ku biiray, waxaa gashay baqdin ah amay doonta guurka ku dhaaftaa? naagna wax kaga xun guur li'i, ninna shaqo la'aan.
dhinac kale waxaa xoogaysanayey eed sheegadkii Dayib.. qoraallo iyo warqado daabcan darsin darsin ugu soo dirayey. duntuna iigu kaa xiran lahaa.. illaa ay u soo yari dabacday.
Waxay go'aan ku gaadhey inay iska illowdaa mustaqbalkiisa hore, kana yeesho codsigiisa ah inay oori u noqoto, aroosna uu la galo.
Waxaa dowr weyn ka qaatay arrinkaa gabdhahii saaxiibbadeed ahaa, baqdin guur li'i iyadoo markaa u gashy gu'gii 22 aad..

Maalin Khamiis bay kulmeen wax walba ka falanqoodeen, meelna isla dhigeen amuurahoo idilna ku heshiiyeen iyo inay qaban qaabo guur galaan kaddib markay helaan Okda waalidka..
Jimce bishu Jannaayo aheyd 11, buu Dayib aqalkii Deeqa yimi, waalidkii dhalayna weydiistey, xaalkoodiina daalacshay, iyagana waxay erayga dambe u daayeen Deeqa oo af buuxda ku tiri:
- waan doonayaa ninakan oo waxaan u doortay inuu noqdaa kii nolosha ila qaybsan lahaa, dhib iyo dheef waxay la timaaddo aynu wadaagi laheyn..
Reerka oo idil baa soo dhoweeyey,Deeqa hooyadeedse kuma faraxsanayn guurkaa inkastoo ayan wax diiddo ah ka keenin aayaha hore ee ninka awgi oo ayan isku habbooneyn.. ruux gu'kaa weyn garasho iyo khibrad nolol ku dheer,' Waa tii horey loo yirise.
Deeqa maadaama ay rag ka soo dhex doorataysе gacmo furan bay iyaduna ku soo dhoweysay.. wax dood iyo cilaaq ahina kama keenin.
Hambalyo.. gacan qaad.. iyo ballan in xafladda guurka la qabanqaabsho ayaa xigtay..
Sidaa baa waxaa ku dhacay aroos caaqibo leh aroos toddobaad si aan kala go' laheyn looga tumayey .. fannaaniintii loo soo xulay inay ka heesaan xabeeb iyo kiishash lacag ah kala tageen.
Munaasabad kalena wey wehlisay oo aheyd Deeqa oo loo doortay inay noqotaa madaxa gabdhaha hoosteeska..
Arooska iyo aroosadda waxay isku raaceen inay bisha hore ee "Honey Moon'ka ku soo qaataan dalkaTalyaaniga, magaaalada "Rome" hoteelka la yiraahdo "Holiday inn". Waxaa kharashka bishaa dhabarka u ritay Shirkadda Dayuuradaha iyagoo abaal marin kaga dhigay Deeqa.

Maalin Talaado ah ayey ka ambabaxeen garoonka Muqdisho, waxaana sagootiskooda ahaa eheladooda iyo asxaab fara badan.
Deeqa oo gees hooyadeed la taagaan, ka dhagaysaneysa cashar la xiriiray habka maamulka guriga iyo arooska isla markaana ballamaya baa waxaa soo gaaray hadal oranaya:
- waxaan rajeyn inayan gabadhani ku illowsiin xaqa iyo waajibka carruurta kugu leeyihiin.
Xagga codka uu ka soo yeeray ayey dhugatay Deeqa mise waa Dayib walaashi tan sidaa ku leh. waxuu markaa gartay in hadalkii walaashi ay Deeqa dhagaheeda ku dhaceen, intuu markaa xaggeeda ku soo cararay



dhinacii diyaaradda u kaxeeyey..
Indho jaceyl.. kalmado cishqi.. erayo kulul oo munaasabadda guurkooda ka tarjumaya ayuu kaga tiray qalbigeeda oraahdii walaashi..
Waxay diyaaradda ka degtay dhabbaha dayuuradaha ee 'Rome' Dayib oo ku leh:
- Ku jecliyaa.. ku jantayaa..

Shuux yar ayaa da'aysay kolkay Deeqa hurdada ka soo kacday.. shanqar ka dhacday buuna ku soo toosay Dayib, hawada 'Rome' wadajir ugu falanqoodeen, ka wada faalloodeen, dabeeto faray fariidii Deeqa inay isu diyaariso, wareeg yar oo 'Rome' gudaheeda ah..
9,00 subaxinmo markay aheyd bay magaalada u dhaadhaceen, goob waliba oo qurux leh tageen, sawirro iska qaadeen iyagoo hadba buskad iyo Jalaato afka isu gelinaya..
Kolkay habeennimo noqotay diskooteekaha la yiraahdo 'Ali Baba' ay isku raaceen inay ku caweeyaan..

Siday ahaataba Deeqa iyo Dayib waxay ku qaateen Rome raaxo dhan, maalin Arbaca ah iyagoo fadhiya beerta Hoteelka baa waxuu adeegahii u keenay dhambaal Soomaaliya kaga yimi, ku socday Deeqa.. waxaana loogu sheegay in Shaafaci, da'da ka yar uu ka helay deeq waxbarasho dalka Jarmalka, jecel yahayna inuu arko inta uusan dhoofin sidaa awgeed ayan la tegin quruxda iyo bilicda 'Rome' waqtigana ku timaaddo..
Dayib ayey ku taabatay warkaa farxadda leh ee soo gaaray, wuuna uga hambalyeeyey.
Muddadii fasaxa baa u dhammaatay waxay ku soo laabteen Muqdisho kala soo tageen 'Rome' xusuus aad u macaan.. eheladii ayaa si diirran ugu soo dhoweysay garoonka, guri looga qabtay xaafadda Howl-Wadaag, qurux, qaab, iyo qalab loo dhammeeyey ayaa la geeyey.
Deeqa jaceyl xiiso ah oo ay dhab moodday, ka aragteyna Dayib baa beddelay, waxay iska dhaadhicisay inay heshay ninkay muddada raadinaysay, ku degi laheyd, murugadii baa ku deysay, keentay inay bilic iyo jamaal sii kororsato, la moodo tusaale gabdhaha xuurulceyn ee ilaahey muuminiinta dhabta ah uu ka ballanqaaday.
maalmahase, maxay u soo sideen....?
waa loo soo socday waxna loo siday, dadkuna sabarka kama wada sinna waxuu Dayib ka codsaday Deeqa inay shaqada ka ruqseysato, waana ay




ka yeeshay jaceylka dhalanteedka ah ee uu tusay daraaddi, inkastoo ay ka xumeyd, haddana wey ka oggalaatay, markuu ka dhaadhiciyey inay shimbiri labo geed wada guran, in ayan isku wadi karin howsha guriga iyo shaqada ....

Badda guuxeysa, mowjadaha gaddoomaya maxay gowda la hayaan ..? Waxay gowda la hayaan asraar iyo xusuus dad leeyihiin oo ku ururtay, digid iyo ishaaro siinayaan doqon ma garato iyo dheg weyn oo idil

waxaa soo dhowaaday safarkii Shaafici.

Deeqa iyo reerka oo dhan baa waxaa ku mashquulay ambabixintiisii .. waxuuna ka dhoofay gegida bil soon oo gabo gabo ah isagoo ku jeeda dalka Jarmalka...

Guurku waa marxaladda ugu adag ee qofka baniaadamka ahi maro. waa imtixaan aan fududeyn doonaya tabaabusho dheer iyo ka fiirsasho wacan .. waa asaas dhismo qoys dhan, sidaa awgeed deg deg iyo fudeyd waa in laga dheereeyaa .. Guurku waa calaf iyo qayb, ha yeeshee labada qof waa inay aad isaga fiirsadaan, midba kan kale miisaan saaraa inuu u qalmo iyo in kale...

Bilo faro badan baa tagey ay Deeqa arrimahaasoo idil ku ogaatay iyo in guurka aheyn dhammaadka dhibaha nolosha qofka, qaxarka samankana aadan is deyneyn intaad neefsaneyso..

Waxaa dhacday maalin Sabti ah inay Deeqa si kedis ah ula kulantay gabar saaxiibbadeed ka mid aheyd Abshiro lagu magaacabay, waxay ku taabatay war ah in Dayib, Naagtiisii hore, iyo labadiisa ilmoodba ay ku aragtay habeen ka hor shineemada Xamar..

Yaab baa ka soo haray Deeqa, waxay is weydiisay waxa beenta ku qasbay, saddex cisho il kama ayan qaadin, waxay u heysatay sida uu ku yiri inuu Qaahiro jiro .. hadalkii baa geli waayey..., Luul oo la socatay baa waxay weydiisay:

- Deeqa ma la socotay arrinkaa ?
- haa, bay ugu warcelisay.

inkastoo ayan ogeyn xitaa inuu Xamar joogo oo ayan la socon, kana xumaatay hadalkaa, haddana dhibaatada iyo dhaawaca u geyisiiyey iskama ayan muujin.. Saaxiibbadii kale ayaa ka tegay, Deeqa iyo Luul baa isku soo haray.. waxay Deeqa dabadeed kaga warrantay xaqiiqda taal iyo dhabta jirta, Luulna waxay ku waanisay Deeqa inayan fududaan,

degdegin, kala xaajootaa qodob waliba si deggan, xalna ugu helaan. sidaa daraaddeed ayey ku tiri, ka aad habaabi meysaan dhabbaha sharaf ku wada noolaashada..

9.30 habeennimo kolkay saacaddu sheegaysay ayey kala tageen. Deeqa iyo Luuley, guryahoodiina kala aadeen.. habeenkaa oo idil Deeqa labo indhood isuma keenin, waxay sugtaba ha sheegin, wax soo socda, xusuus - qorkii ayey eegtay waa habeenkii uu yiri waan soo laaban.. hadba mowjad Raadiyaha ka saar, hadba cajalad ka dhawaaji, raadkiisase weli ma heyso.. illaa ay daashay.

Kadeed.. kul.. iyo Karah ayan fileyn dhinac kasto ka soo hareereeyeen. Xaaladda sidaa ah iyadoo ku jidha baa waxaa soo yeeray oo ay maqashay shanqar xagga illinka ka soo dhacday, irridda bay dhugatay, mise waa Dayib, wuu ku yara hakaday isagoo dhowraya sida uu ka caadeystay inay ku soo oroddo oo ay ku caawinta bxinta dharka, wuu u dhoolla caddeynayey ha sheeginse xitaa inay halkeeda kaga soo dhaqaaqdo.. Dayib baa dhinaceeda soo abbaaray, daanka ayuu ka dhunkaday, waxuu weydiiyey waxa helay, iyana waxay ugu warcelisay waxba.... In yar dabadeed baa iyaduna waxay weydiisay halka uu ka yimi saacaddan dambe ...

waxuu ugu warceliyey :

- haddadan baan garoonka ka imid, aadna waan u daalanahay oo waxaan dooni nasiino iyo hurdo macaan.
- Dayib, waxay ila tahay inay beenta innagu habbooneyn wanaag ku jirin, miyaadan habeen hore shaneemadaa ku jirin, ? been arrin ay murgiso ma ahee, arrinna ma caawinto ... kolse hadday middani dhacday, waxaan rajeyn inaynu marlabaad ka waantoobno.

kuma lehi xiriirka u jar ilmaha, xil baa innaga wada saaran ha yeeshee beentu waa malag mudacyo sidata, dadka ay ku muddo, cilaaqdka wacan ku kala goyso..

Dayib wuu ka cudurdaartay, iyana ka qaadatay.

Sidii wanaagsaneyd buu xiriirkooda ku soo noqday, xayaatadoodii ku hagaagtey, xeyska ugu da'ay, xurriyad buuxda bay Dayib siisay dabadeed iyo inuu sidoo doono ilmaha uu u la soo caweeyo.

Waxaase jidhay arrin ah in Dayib Deeqa ka xiiso dhacay, oo ay qof caadi ah ula muuqatay, waxaa jidhay arrin ah inuu Deeqa u guursaday ujeeddo



fan awgeed, waxaasi oo idil Deeqa uma muuqan khaladaad yar yar oo ka dhacana, dan iyo ahmiyad weyn ma siin jirin. Waxaase marmar geli jiray dareen ah inuu sidii hore aheyn.

Deeqa beryahii dambe waxaa ku billowday wareer, iyo madax xanuun si kedis ah hadba ku soo booqanaya, xilli xilli ugu imanaya, matag, kolkay wax cuntaba iyo qaraar. waxay siyaaratay Dhakhtar takhasus sare leh oo ay tiqiin, waxuu u sheegay inay xaamilo tahay, hooyo ay noqon..

Farxad bay isla heyn kari weyday, waxay taksi u kireysatay rugtii shaqada ee Dayib.. waxayse farxaddii ku qabowday kolkuu u sheegay inuusan carruur ka dooneyn, labadu uu leeyahayna ku filan yihiin.. naxdin.. aamus.. yaab.. baa qabsaday.

Arrintan waxay aheyd dhibaatadii ugu darneyd, mid aan lays moogeysiin karin tan iyo intay is guursadeen..

aad bey dhibaatooyinka intaa kaga bateen dabadeed, isagana sii xumaadeen, maalinba maalinta ka dambeysa waxaa Dayib uu dilayey, goynayey geedkii jaceylkii calaal iyo catow ka soo yeeray isaga ku abuurmay... Deeqa waxay ka gaadhay dhii'dii, waxaa aad ugu adkaaday inay Dayib la noolaato, kaddib markay ka heli weyday qeymo iyo xurmad afannimo..

Deeqa hooyadeed bay arrintaa daalicisay, toogadeed u sheegatay, talo weydiisatay... waxayna hooyadeed ugu baaqday inay sabar kaashato.. Aad iyo aad buu dabadeed isu beddalay Dayib dabeecaddisii dhabta aheydna u soo banbaxday.. dhurwaa dhar aadami xiran .. beryahii dambe xaqiraad iyo inuu il xun ku dayo ayuu billaabay, waxayna Deeqa u kordhisay arrintaasi murugo.. ciil.. tiraanyo.. iyo boohin .. fekerkii oo ka batay awgeed baa waxaa ka dhacay culeyskeedii kiilooyin... midabkeediina doorsoomay.

Waxay garan weyday wax allaale iyo waxay sameysaa.. been raad ma leh.. caku barashadii xun... iyo beer nugeyl.. caku fudeyd iyo fiirsasho li'i .. Deeqa waxay ka war heshay in Dayib weli qabo, uusan furinna naagtiisii hore.. taasoo ay ku dhabowday dhakarta uu la dhuumanayo, iyo daneyn la'aanta kolkuu guriga yimaado... waxay damacday inay ku soo qaaddo waqtiyada dhifka ah ay aragto waxayse xasuusatay hadal uu ku yiri ahaana:-

- Haddaad dooneyso inaad xayaato wacan ku noolaato, waa iga dardaaran inaad arrimaha i gaarka ah fara gashan.

Wiish baa ku yeeray Deeqa, cabbur dhinac walba ah ayey dareentay, waxay is weydiisay in Oxygen-kii hawada uu ku yaraaday.. waxay ka bixi weyday:
- alla maxaan sameeyaa ..? .. shaki yar baa haddana galay in warkaasi run yahay iyo in kale ... dow ay ku hubsato bay baartey waxaa ku dhalatay fikrad ah inay toos ula xiriirto xaaska weyn. xog warran weydiisato .. iyadoo si maldhahan ula hadleysa.. waxay dirtay taleefonkii waxaa ka qabtay adeegtadii, kolka ay weydiisay halka ay jidho, waxay ugu werceliday inay iyada iyo ninkeedii Dayib Suuqa wada aadeen.. halkaasoo ay ku yiqiinsatay miskiintii Deeqa dhabta hadalkii..

Boor.. siigo.. baa wax waliba ka fuulay .. waxay laheyd erayadan:
- miyuu i khaa'imay Dayib .. kaan nolosheyda u dhiibay.. mooday ammaanada inuu xajin karayo.. waa inaan sariir dambe kula seexan, guri aan kula hoyan..
Waxay boorso ku urursatay waxay dhar laheyd, goosatay inay uga tagtaa guriga, sidaa bayna kaga soo baxday gurigeedii.

Deeqa waxay ka fekereysay ficillada iyo falalka xun ee Dayib uu kula macaamiltamay, war uma heyn meel ay mareyso, waxay ka tillaabeysay waddada Baar Ubax, goonyaha ma ayan eegin,waxaa ku qaaday gaari weyn oo Bal siday aad u soo dheereynayey. waddada dhinaceedii kale intuu ku xooray, miyir li'i ku hubsaday... dadkii ayaa ku soo kala yaacay baarka fadhiyey cisbitaal ayaa loola cararay.. daawo iyo loola tagay cirbado indoor ah kaddib bay indhaha soo kala qaadday, mise waxay dhexda kaga jidhaa Dhowr gabdhood oo wada bukaan jiif ah, faashad baana ku duuban qayb xubnaheeda ka mid ah. Deeqa oo garan la' sida ay wax ugu dhaceen baa waxaa timi Kaalisadii, yari dejisay, kheyr u sheegtay iyo inuu dhaawac fudud gaaray oo ay durbadii ka kici doonto. Deeqa waxay weydiisatay Kaalasadii inay ugu ciidan dirto hooyadeed kaddib markay taleefonkoodii siisay..
habartii dhashay oo barooraneysa ayaa timi lehna.
- Alla gabadhaydii, wax allaale iyo waxay Deeqa u baahan tahay u keentay.adeeggeeda aheyd tan iyo intii la faray qolada bukaan booqadka ah oo idil in waqtigii dhammaaday.. Deeqa waxay dareentay in xarakadii iyo dhaqdhaqaaqii caloosha ay joogsadeen.. Kaalasadii bay ka codsatay inay bal baadho caloosheeda, go'aankii baaristana waxuu noqday in Ilmahii ku dilmeen..



Waxay deeto ka codsatay Kaalisadii inay warqad iyo qalin u keentaa, halkaasoo ay ugu qortay Dayib warqad ay ugu lafa gurtay waxii gef ahaa ee uu ka galay.. intii wanaag ahaa ay u gashay... godobbadiisii... abaal ninkii kuu galaa waa loo gudaa khaladkii aad igu sameysay gadaal baad ka garan doontaaye .. ee hadda iyo dan waxaan kaa codsan si walaaltinnimo iyo wanaag leh inaan ku kala tagnaa.. maadaamo aan nahay kuwo aan isu qalmin, codsigeygan si degdeg ah baan kaaga sugi inaad iiga aqbashaa warqadda furriinkana aan kaaga helo.
kolkii waagii uu baryey ayey Deeqa waxay u dhiibtay warqaddii kaalisadii, weydiisatayna inay boostada ugu dirto.. culeys weyn oo saarnaa baa kaga degay Dhambaalkaa..

Xaaji Maxamed waa Deeqa aabbaheed, waana madaxa shirkadda 'J.R.B' isagoo xafiiskiisa fadhiya baa waxaa loo keenay wargeysyadii maalintaa se waxaaba ku yaal war uu 114 jeer ku noqday akhrintiisa, sidan u dhignaa.

> waxaa degay markab laga lahaa dalka Talyaaniga kuna soo socday xeebta Berbera ee dalka Soomaaliya.. dadkii saarnaa badi waa la badbaadshay labo qof baase ku geeriyootay, saddexna illaa iyo hadda raadkooda lama hayo.. waxaana ka mid ah Ganacsade Dayib

Dayib toddobaad ka hor buu u duulay 'Rome' si uu u soo dhammeeyo gorgortan badeecad baahi daran loo qabay, isla markabkii lagu soo qaaday buu soo raacay oo ahaa midkaasi degay.. Xaaji Maxamed aad buu uga naxay warkaa wargeysyada adduunka oo idil baalka hore looga daabacay, waxuuna alla kaga baryey.. inaan waxba gaarin degdegna loo helaa in kastoo gabadhiisa uu xumeeyey waxuu deeta darsay, xagal walba ka eegay sida uu Deeqa u saameyn karo, gaar ahaan iyadoo furriin ka dooneysay ay kaga nasato dhibka iyo qaxarka uu tusay.. tacabka iyo mashaakilka. sharcigana waa kaa qaba in ay naagta ku xirnaaneyso ninkeeda haddii aan geeri iyo nolol midna lagu ogeyn.. illaa iyo muddo afar sano ah., haddii muddadaa iyada ah wax sheega la waayo ay iska fasaqi kadho.. Deeqa iyadoo war moog ah sugeysa warcelintii qoraalkii ay u dirtay baa waxaa si deggan warkii ugu gudbiyey hooyadeed, isla markaana ku waanisay inay howsheeda ku laabato..

Deeqa shirkaddii bay arji shaqo ku noqod u qoratay.. Gacmo furan bayna ku soo dhoweeyeen..

Howl, hab, niyadsan ayey xilkeedii u gudaneysay sidii kal hore. Waxaase jidhay inay farxaddu sidii hore ku aheyn noloshana ka dareen la'eyd. Waxaa aad u xidideystay xiriirkooda iyada iyo Luuley, waxay ahaayen sida labo naas wada nuugay, ul iyo diirkeed, qof iyo hooski.. Dhinaca kalena waxuu 'Germany' xiriir kedis kaga dhex billowday, gaaray heer sare Werenbag iyo Shaafici. Waxay noqdeen sida labo dhiig iyo dhubuc ay u dhaxeyso.
Werenbag waxuu weydiiyey Shaafici hadduu aqoon u leeyahay gabadh Soomaaliyeed Soorto ah Qaali la yiraahdo oo ah magacii ay isugu sheegtay Deeqa.. waxuuna u sheegay inuusan aqoon u laheyn.
Deeqa waxay yari farxad yar soo geli jidhay kolkay aragto Luul oo ay kulmaan, waqtiyada kalese waxaa dhinac walba kaga imanayey feker la xiriira mugdiga nolosha, murugada iyo ciilka, dhibka iyo tiiraanyada xag kasta kaga timi. Lix bilood ayey shaqadii ku wadday niyad saafinnimo qasab isaga raadin. waxay aragti madow ku eegaysay dunida oo idil. Kaddib waxay qaadatay fasax labo bilood ah. Deeqa maalin duhur ah iyadoo fadhida barsadda aqalkooda baa waxaa u soo galay aabbaheed oo markaa shaqada ka yimi. waxaa ka muuqday daal iyo tiiraanyo. waxuu u sheegay in ruux kasta oo nadiif ah dhibaatooyin badan dunida uu kala kulmi.. maalmahu ku qallocan.. waxuu u sheegay in lagu masabitay, xaggiisa loo soo xagliyey xatooyo xoolo dadweyne lacag dhan Sh.So. 850215.05 shirkaddana laga lunsaday.

Tuhmadii loo soo jeediyey isagoo kaga sheekeynaya ayaa waxaa laga qabtay wadnaha, kaddibna ruuxiisii dhiibay, naftiina halkaa ku waayey. Deeqa naxdin iyo muraara dillaac awgeed buu codkii ku xirmay.. jab weyn oo reekooda ku yimi bay arrintan aheyd.. dhibaato iyo murugo cusub bayna kuwoodii hore ku biirisay. Tacsidii aabbaheed baa lagu jiray kolkay aqalkoodii yimaadeen koox isugu sheegtay in loo xilsaaray inay baarayaan halka uu lacagtii aabbaheed geeyey.. waxay is aragtay Deeqa intay is illowday iyadoo ku leh :– maxaad innaga rabtaan ? soo kifaayo ma aha inaad aabbahayaga disheen.. maad iska keen deysaan .. Durraan oo ahaa madaxa guddigaa loo magacaabay qiimeyntii hantidii oo ka tagay aabbaheed ayaa intuu u yimaado ka codsan inay is dejisaa, wax balaayo ahna jirin.. Ku soo noqnoqodkoodii gurigaa waxuu fursad u siin inuu bartaa gabadhaa marxuumka, si uu kaga helana xiriir wanaagsan, waxuu ku dadaali kuna guuleysan sida uu u baabi'in lahaa arrintii loo soo diray.





Durraan waxuu barashada Deeqa ku waayi hanti fara badan, waxay ku wadi jidhay qowda maqalsii waxna ha u qaban.. nafsad ahaanna ugu dhimay. waxaana dabiici aheyd inuu isaga haraa kolkuu wax faa'ido ah ka waayey, iyo soo dhoweyntii wacenydba.

Digir baa deeta nolosheeda ka soo if baxay oo ay dhulka isna ku masaxday, dano fara badanna ka qoonsatay. Waxaa Deeqa gabigeedaba saaqsanaa dareen ah inay rag oo dhan ka aargoosato, soo ma ay doonayaan hannaankeedaa wanaagsan, cadceedda kala dillaacin, dayaxana madoobin, soo ma ay doonayaan jirkeedaa dhalaali sida cambaruugta bislaatay, soo may caashaqin midabkeedaa sida mareerka casaanka ah, giddigoodna ay nafaftooda u hurayaan sida ay habeen qura u haleelaan.

Waa hagaag, ha la baxeen qiimaheeda marka kollay haddey la dhaceen bilicda toolmoon ha la baxeen cagteeda oo dusha ka saaran shey walibana qiimahood, ididdiillo kastana qaddarkeed iyo dadaalkeed, hanti iyo waxay xoolo leeyihiin khasnadahooda bay ugu urursantahay, waxayse doonayaan gacanteeda buu ilaah geliyey, iyada ayaa iska leh, waa mulkigeeda, waxaa ka sarreeye oo qura dharkaa ah moodalladii ugu dambeeysey ee Paris, lehna midabyo indho sarcaadin.

Samanka aynu hadda joognana dunida waa beecshuro, xigaal, qaraabo, wado dhalasho, warkood daa, waxaa dadka walaaleeya waa dan iyo maslaxad haddaan laysku heysanna lays ma yaqaan, waa salaan aan niyad aheyn waxaa gacanta laysu saaraa. noloshii waxay isugu soo biyo shubatay i 'sii' aan ku 'siiyee' halheyska aadanaha ayey noqotay mabda'a iyo diinta maanta la wado qabo oo laga wada siman yahay.

Mana jirin Deeqa axad niyadsan ugu yimid , waana tan keentay inay joogto nacald ugu tuurtaa dhurwaayada.

maalin iyadoo keli ah baa waxaa ku soo dhacay su'aal ah :-

- Maxaadan reerkan deriskiin ah dhaqaalo xumadu heyso wiilkooda weyn shaqo inuu helo aadan ugu caawimin ?

waxaa ku soo dhacay Durraan oo ay arrintaa sida biyaha la cabbo ay kala fududdahay, nasiib darro toddabaad ka hor ayey wargeys ka akhristay in danjiro loogu magaacabay dal kale oo ayan xasuusan , haddaba hadduusan isagii joogin iyaad kala kaashataa bay ku fakartay, xeelad baan garab marin, xigmad baan seegin, garasho baan hareermarin, garaadkeeda baan khaaimin, waxay ku fakartay inay la xiriirtaa qeyrki gaar ahaan kuwaa isaga u dhow islana biyo cabbaan, kooxahaasoo aan





shaki ku jirin inay awood iyo nafuud intaba u yareyn.

Jartii bay degtay, taleefonkii garaacday, codkii ayaa dacalka kale ka soo gaaray, salaan diirran oo macaan ayey ka horgeysay, deetana weydiisay inay la hadashaa Durraan. Waxaa si kooban looga warramay halkuu aaday, deetana uu weydiiyey ninkii la hadlayay :-

- Abbaayo magacaana, codkaada waa igu yaallaaye ?
- Deeqa Xaaji Maxamed.
- ahlan Deeqa waa sharaf iyo farxad inaan ku bartaa?

allaha a naxaariistee aabbahaa waxuu ahaa nin magac, kalmad iyo samaan ku caan baxay,.

ilmo ayaa ku soo istaagtay, waa kolkii ugu horrerysay ay ka maqasho mid ka mid ah oo wanaag ku sheegaya inkastoy hubtay in ujeeddada ka dambeysaa ammaantaa ay badi tahay si uu ugu guuleysto inuu kalsoonideeda helaa, xiriirna ku kasbadaa.

waa dhurwaa cusub, koolinaya inan dheyla ah. si habeen habeennada ka mid ah uu ugu casheeyaa, labadiisa miciyood dhexdoodana uu ugu dhex hubsado. waxay ka hor tegaysay ilmo dirqi dooneysay inay kaga soo baxsato labadeeda indhood iyadoo ku leh:

- waan kaaga mahad celin dareenkaa wanaagsan.
- Dhubbad ayaa lay yiraahdaa, haddaan walaaley iskaa baro, saaxiibtinnimo dhiig iyo dhubuc ah waxay inoo dhaxeysay Durraan waxaana ku faraxsanaan lahaa inaan Deeqa waxay doonto u qabtaa si kastaba ha u adkaadeene.
- ma illaa iyo heerkaa mudane ?
- sow ma aadan oran Durraan baa baahi daran ii heysay.
- way jidhaa.
- haddaba mir aan ku iraahdo, waxaad ka fileysay inuu kuu qabtaa iyo ka badanba aniga ayaa kuula diyaar ah.
- wacnaan laheydaa, haddey suura gal tahay
- Deeqa, ma ii imaan kareysaa haddadan la joogo ?
- ma hadda ?
- haa, waana aan kuu sugi, waxaan kaala ballami gaarka inay ii kaa soo daayaan.
- ma garanyo sidaan iyo waxaan kuugu ablaagudi lahaa, ma garanayo sidoo kalena sidaan kaaga mahad celin wanaaggan.
- waa ku sidee Deeqa, waa maxay waxaad sheegeyso, waxaan rajeyn inaad



u aragto booqashadan sida kuwaa aad xigtada iyo ku soo qaraabo salaanto.
- marnaba is ma oran sidaa bay arrimo noqon.
- midna waa codsi qaali, inaad xafiiskeyga sida guri aad leedahay aad u aragto.
  mar labaad ayaan kuu mahad celin.
- ma garaneysaa halka aynu ku naal ? waxaan ula jeedaa ay rugtayada tahay.
- waan garan.
- gaari miyaan kuu soo diraa, mise waad heysataa ?
- dhib ma leh taksi ayaan iska soo raaci.
- haddaba, waxaan sugnaaba waa nuurkaaga iyo sharfiddaada.
- nusi saac kaddib waan kula joogaa.

Samaacaddii ayey halkeedii ku celisay, iyadoo dhoolacaddeyneysa guushaa ay soo hoyisay awgeed. way hubtay inay goolal badan ay ka soo hoyin doonto cayaarta, gacan sarreyn doontana labadeeda gelin, wey hubtay inay hadafka ay dooneyso iyo waxa ay damac santahay gacanta ku dhigi doonto, waayo waxay garaacday irrid sax ah, qoladan iyaga ah si kastaa ha u shakhsiyad daciifsanaadeene waxay karaan waxaan la koobi karin awooddoodna leeyihiin.

Candhuuf yar ayey tuftay iyadoo ku leh sowd gibin ah samaceediina gaaray kolkay taleefonka iska dhigtay:-

- Kanina waa dhurwaa cusub, allow ina badbaadi haddaynu haween nahay, sabeennadaa fallaraha iyo tooshashka loo wada sito.

Waxay ugu gashay cadceed sideed, nuurkeeda uu ka horreeyo, udgoonka la yiraahdana 'Madame' uu u goob xaarayo, intuu yari xoogaa dhaafeyna billabay inuu yeershaa buun ah ogeysiin in Malaaigi carriga soo gashay, udgoon dunida ku hareereysay, ileys, shucaac, iyo iftiinna ku dahaartay, xubbina ku mug buuxisay.

Waxay xirnayd saako jilbaha ugu jooga, leh midabka shimbirahaa huruudda ah ee aroor waliba ka heesa geedaha korkooda, boorso ka sameysan Antiloob ceynadda ugu sarreysa, laguna dhayey midabka haafaanka, boorsadaasoo ka lulaneysay garabkeeda, kabo maqaar ah qurux iyo bilic ka muuqata, ku sigeysa cunid qayb kasta oo ka mid ah labadeeda cagood ee yar yar, shilis hareereeyay qoorteed dheer ee sida biriq dhaceysa hadba ganeysa nuur indhaha lagala baqo, suunka ku

giijisanaa dhexdeeda waxuu ahaa dhameystir sare oo ka marag kacaya dooqeeda sare. jirkeeda tin iyo cirib ka dhaxowba waxaad moodi inay ku leeyihiin i cun oo i calaanji amaba sidaa baa ku qaban.
Deeqa waa qalanjo sare garaneysa waxay gasho iyo waxay guddo, garaneysa siday nafsad waliba higso ugu tahay iyo hillaac rajo geliya, Waxuu ka soo kacay kursigii uu ku fadhiyey , isi soo taageyna baratamahii xafiiskii si uu u soo dhoweeyo xowral ceyntaa siyaarada ku soo sharaftay, waxaana ka mid ahaa erayaddisa:
- ahlan Deeqa, Ahlan Deeqa, aad baad inoo sharaftay.
Dhoollacaddeyn ay horay ugu soo fiirsaty ayey oodda ka qaadday iyadoo u salaan gacan taageysa, udgoonkeediina weli hawada uu qasayo waxayna ku warceliday salaantiisa oraah seddex eray oo qura ka kooban:
- Barasho wanaagsan Dhubbad
waxuu dejiyey mid ka mid ah labada kursi ee xafiiskiisa hortiisa ahaa waxaa u dhexeeyey miis weyn waxuu isagana degay kiisa ka soo horjeeday isagoo weydiinaya:
- maxaad dalban? cabitaan sare oo leymoon baa yaal.
wey dhoollacaddeysay, iyadoo ku warcelin sida gibin toban aan weli gaaran:
- kaas baan jeclahaye.
- isla mid baynu nahay, waxaan ku doorsado anigu maba jiraan.
In yar oo aamus ah dabadeed, isagoo kala hagaya neeftiisii durdurada iyo tartanka ku jidhay:
- waxaana inoo yaal oo kale qahwo mucjisa ah oo la udgiyey, martida sharafta leh sidaada gaar ahaan loogu sameeyo.
in yar oo aamus dabadeed haddana, dunidana ay u sacab tumi iyo durbaan malaaigtaa soo booqatay , soona dhoweyneysa dhoollacaddeynteedaasi iftiinka dhiigeysa ayey waxay weydiisey:
- ma bun la yaab leh ?!
- haa, oo la udgiyey baan ku iri,
- fiican
- ma jeceshahay ?
- aad, wax kala ma anaa cabba.
- Wanaag loo wada qir.
- dabcan, (qosasheyna)
Dhubbad intuu is celin kari waayey ayuu waxuu oodda ka qaaday qosol qufac sidi u dhacay
Sida carruurta ayey u hadleysay, xoog isna uu ka qaaday, hadba waxaa ku



dhalaneysay oo uu iska celinayey inuu intuu u soo kaco gaadddada ku qaado dhunkashana uu ku waalo qayb waliba oo xubnaha jirkeeda ka mid ah... abuurkan oo kale waa dhif, waa naadir, waa fariid tani faceed faro iyo wax walba dheer., taniba ma gabarbaa la mid ah, malaayiinta gabdhood ee ku kala firdhisan afarta waaxyood ee adduunka ? ma la oran karaa waa aadane ? suura gal ma ah, maba dhici kadho.
Meykarafoon miiska dul saarnaa ayuu intuu soo dhoweystay cod gaaban ku yiri:
- Casiir leymoon, iyo coffe, halkiisiina ku celiyey xaggeedana soo abbaaray isagoo leh:-
Sidaan markii horeba taleefonka kuugu sheegay, waxaan ku faraxsanahay anigoo Deeqa ididdiilooyinkeeda kaga dhabeeyo iyo arrimahii aad Durraan ka dooneysay, iyo dalab kasta.
- Dalab kasta aa?
- Waxba ha la kala harin.
- Si kastaba ha u qiimi iyo qaayo bateene ?
- Ma jiraan wax kaa qiimi badan, amaba adiga kaa qaalisan? Qaali
- Waxaad mooddaa inaad igu beereyso geesinnimo weyn, si aan danaheyga oo idil kuugu sheegtaa.
- Taas baan rajeyn.
Hadafkeedii ayey erayo kooban uga faallootay, waxay dooni in jago bannaan looga dabbaro inan ay daris yihiin wasaaraddan, si uu door kaga qaato dhismaha reerkooda badan, dhaqaalo xumina ay la jiifatay, Wuu dhoola caddeeyey, dhoollacaddeyn Deeqa gabigeed rajo gelisay. deetana weydiiyey:
- Waxaad weyneyneyso sida buur dhagax ah aad ka yeeshay, ma taa keliyaa?
- oo miyey fududdahay ?
- Xaggaaga qofkii ka socdaba haa !
- Arrintaa oo qudh ah baan kaa lahaa, haddaad wax ka qaban kadho?
Waxuu ka qaatay magacii iyo faallo kooban oo la xiriirta waxa uu yaqaan, waxuu la hadlay deeto madaxa qaybta shaqaalaha farayna in jagadii uu cidleeyey Axmed Gacal ninkaa cusub uu tilmaamahiisa siiyey lagu wareejiyo, isagoo maanta looga billaabi mishaaharaddiisii.
Waxay dareentay Deeqa in labadeeda indhood ee quruxda badan ahna sida kuwaa deerada, ay meel aan dhoweyn u qaadeen, hillaac fog soo haabiyeen, iyadoo baddaa riyada ah ku jidha, ayuu waxuu weydiiyey:-

- Xaggaad u kacday Deeqa ? maankaaga yaa la tagey ? miyaad maqan tahay mise waad joogtaa ?
- Miyaan kuu sheegaa ?
- Dabcan, waxaan rajeyn inaadan waxba aadan iga qarineyn
- Waxaan marnaba is oran sidaan buu Dhubbad Amiir u yahay!
- Ma iyadaa tan wax ah?
- Siday ahaataba mahad weyn ayaan kuu celin.

Waxaa uu ugu muuqday sida ruux waalan oo kale, fudeydkii ka muuqday awgeed, sida bahal dugaag ah oo muddo meel geeri go'an ah iyo abaar aan ciirsi laheyn ku rakaaday, si kedis ah ku helay Baciid yar oo baadi ah, iyo Il biyo saafi ah durduraneysa. Deeqa mayan aheyn sida uu moodayey, waxayna noloshiisa kaga siibatay si fudud iyadoo wax xaggeeda kaga hirgalay ayan jirin.

Waxay aheyd maalin Isniin, waxaa taleefon Deeqa kaga yimi shirkaddii oo ka codsatay inay ka soo qayb gasho xaflad loogu dabaal dagayo sannad guuradii 10 aad ee aasaaska "Somali Airlines"

Waxay aheyd xaflad lagu casumay wafuud kala duwan, iyo howlwadeenno fara badan oo ay ka mid ahaayeen Sardheeye iyo xaaskiisa Saafi. Casho heer sare ah miisaska ku kala daadsaneyd si buux dhaaf ah, shiraab aan kala go' laheyn iyo miyuusik riyo macaan kuu gelin. Si kedis ah waxaa ku kala yaacay miisaskii dhowr gabdhood oo ay indho ku daali kuna jawaab seegi hadday is weydiiyaan tooda ugu qurux badan, waayo giddi waxay ahaayeen kuwo qurux si haqab la'aan ah loogu tiriyey. ha yeeshee mid baa jidhay aadna ugu dhex muuqatay, sidii cadceedna u cawireysay goob joogayaashii, waxayna aheyd Deeqa. Kooxdii malaaigaha ahaa Deeqa ay ku jidhay baa waxay isu qaybsheen dadkii loo yeeray. waxay u qaybinayeen waraaqo la xiriira barnaamijka habeenkaa.

Mid ka mid ah malaáigahii baa waxay ku soo dhowaatay miiskii ay fadhiyeen Sardheeye iyo afadiisa Saafi, middaasina waxay aheyd Deeqa oo habeenkaa aheyd dab naar iyo olol, kuleykeedana qof kasta uu saameynayey, candhuuf baa gadaal loo wada liqay kolkay soo baxday. Sardheeye oo ay xaggiisii ku soo socotay - afadiisana ay hareer fadhido waxay ula muuqatay sida uu nin kaleba u arag, isuna tusin, waxuu dareemay kolay indhahiisu ku jeedeen, in nafleydan fariidda ah ay u sugnaatay furahii jannada oo idil.



Waxaa isku dhacay indhahoodii, kolkaa buu waxuu noqday sida nin cirbad si lama filaan ah loogu duray, jariiracyo baa gebigiisaba qaadday, waxaa kordhay garaacii wadnahiisa, labadeeda indhood waxaan laga aqoon kuwaa gabadhiisa.

Sucaad waa labaatan jir, middanse sida ka muuqata waa shan iyo labaatan jir, indhaheeda waxaa ka baxaya sharaarad biriq aad mooddo, carri dhan ifin kadha, joogga iyo jamaalka iyaga warkoodba daa.

Waxaa hubaal ah inay tahay mid ka mid ah kuwii jannada lagu sheegay miyeynu oran karnaa ku masiili karnaa naagaha kale ? ayuu Sardheeye is weydiiyey ? waa waxaan dhici karin, middaaney sifaale iyo qiyaas isku jaan gόan baa loo abuuray waxaan caad qofna ka fuulin in iyada oo kale jirin, jirina doonin. Iyadoo ku soo dhowaaneysa afadiisana ay hareer fadhido waxaa la moodsiiyey , qaawanaan isagoo ku mala awaalaya, inay xambaarsantahay hubkii dunida ay ku geddin laheyd, holac dab dhiiga iyo dhulgariiryo ugu horseedi laheyd, waxay hor istaagtey miisaddoodii, waraaqihii barnaamijka habeenkaa ku sidday dambiil qurxoon oo dhudhunkeeda ka lulaneysay.

Waxay wac ka siisay dhoollacaddeyn wajigeedii nal sidi u ifisay iyadoo ku leh:
- fiid wanaagsan
- fiid wanaagsan marwo,

ayey mar Sardheeye iyo Saafi wada yiraahdeen, Saafi ayaa waxay ku sii raacisay cod soo dhoweyn ah:
- salaan iyo hadal ka sokowba, su'aal qura ma ii oggolaan inaan ku weydiiyo ?
- kun su'aal haddaad doonto waa ay kuu furan yihiin, waana soo dhoweyn
- walaal, ma waxaad ka mid tahay dadka dayaxan ku nool, mise marti dayax kale inooga timi baad tahay.

Wey dhoolla caddeysay iyadoo ku warcelniysa asluub ruux suugaan iyo dhaqanno kala duwan daalacday kuna dhex noolaa, buugaag kala geddisanna akhristay:-
- waxaan qabaa in ilaah deeq iila kala harin, wanaagna uusan iga bakheylin, kolkuu iga dhigay mid ka mid ah khalqigiisa adduunkan ku ceysha ay dushiisa ku nooshahay marwo leh quruxdaada iyo hannaankaaga gacaliso.

Saafi intay yari garbaheedii kor u taagtay tiri :-
- calan cad baan taagay , waxaan ahay ma jiraan run ahaantii kolka lay barbardhigo quruxdaadan, habdhiskaada sare, sokortan ka daadaneysa labadaada dibnood si qaluubta ay macaankooda uga waraabaan dibnaha ka sakow, maxaan ahay? yaanse noqon?
Waxay Deeqa durbadiiba ugu jawaabtay :-
- i rumeyso wallaahi, nin ka nasiib badan ma jiro, kaa ilaah uu ku keli yeelay hannaankaaga oo dhan, kagana dooray khalqigiisa kale.
Waxaa dhoolla caddeeyey Sardheeye, kolkii ugu horreysay, kana baraarugay beer iyo wadne balal, koronto ku dhigtay daqiiqado ka hor markay ku kedisay qalanjo hortiisa taagan, si ay isaga iyo afadiisa warqadaha barnaamijka habeenkaa ay u siiso kaddibana isagoo hadalka qalanjada u wada :-

- Xaaskeyga aan ku baro Saafi Cabdillaahi, anigana ii oggolow inaan iskaa baro Sardheeye, maamule ku xigeenka shirkadda horamarinta beeraha.
  Deeqa waxay soo ceshaneysay qayb timaheedii jilicsan ka mid ah oo ay leedhu dhinac u jalleecisay kolay laheyd :-
- Barasho wanaagsan, in yar oo aamus gaaban ah dabadeed:-
- Deeqa Xaaji Maxamed, soorto Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed.
  Deeqa ayaa hadalkii sii wadatay.

- waxaana ka dambeeyey ka qaybgalkeyga xafladdan, iyo waraaqaha qaybintooda codsi laysoo jeediyey anna aan soo dhoweeyey. waayo fasax ayaan ku jiray.
  Saafi ayaa hadalkii ka qabstay kuna tiri:-
- si aynu kuu aragno, aadna naftayada u qanciso, kuu khashuucno, wanaag iyo qurux kuu qirno.
- ammaanta maad walaaley iga kala deysidy, yaanan kala badane.
- waxaan leeyahay gabar keliya la yiraahdo Sucaad, labaatiinkii bilo yar ay u dheer yihiin, aad baadna isugu indho eg tihiin.
- Ilaah ha idiin daayo adiga iyo aabbaheedba.

Waxaa ka kala gooyey Sardheeye sheekadii ay afadiisu weydaarsaneysay abuurkaa la yaabka leh, shimbirkaa midabka qurxoon ee Jannada ka soo



duulay, isagoo ku leh:-
- Saafi, sheekada Deeqa ila ma aha mid laga bogan karo, waxayna iigula muuqataa inaynu shaqadeeda ka curyaamin, deetana ku jeestay:
- Maxaad ka qabtaa inaynu casho kugu casumno? goormaase is leedahay way ku habboonaan kartaa ?
- En Hadda, idiin ma sheegi karo.
- Waa hagaag, waa kan kaarkeyga shaqada, waxaad ka heli dhammaan taleefonnada aan leeyahay.. maalinta aad is tiraahdo waa O.K. ii soo garaac.
- Waad tahay ayey Deeqa laheyd iyadoo ka qaadeysa kaarkii.
Sardheeye intuu is illoobay buu waxuu is arkay isagoo ku leh cod weyn:-
- Farxaddaa mar labaad inaynu ku aragnaa ah ha innaga qadin Deeqa!

Haddana intuu is gartay, buu wuxuu dareemay in oraahdaa maseyr gelin karo afadiisa, saa waxuu raaciyey si uu khaladkiisa u saxo:-
- Miyeynan sidaa aheyn Saafi ?
- Waa sidaad u sheegtay Sardheeye.
Way ka idin qaadatay Deeqa, si ay howsheeda u sii wadato, iyadoo sii fogaaneysa. waxaa ku dheygagsanaa dadkii joogay oo idil, indhahoodii baa waxay diideen inay meel kale milicsadaan, aan aheyn fariiddaa ceynteeda yar yihiin, waxaa dadka gilgilayey, jariiracyo jirkooda biday, midabkeeda dhiinka ah, timaheeda madow ee dhex mushaaxaya dhabarkeeda, kububkeeda culus, indhaha qurxoon, jirkeeda isku dheella tiran, waxayna xafladda dhammaatay iyadoo ruux waliba is weydiinayo kun su'aalood oo Deeqa la xiriirta.

Saacadda tobankii subaxnimo ayey sheegeysay.. Sardheeye waxuu fadhiyey xafiiskiisa, jaraskii taleefonka ayaa yeeray, mise cod dumar ah oo dhuuban sida miyuusiggana u dhici baa ku leh:-
- Subax wanaagsan.
- Wanaagsan, waa qofmana walaal ?
cod qosol ku dheehan yahay sida ay ka canaananeyso garowsha la'aanta:
- Waa war adeer ?! dhowr cisho keliya baad codkeyga ku illowday ?!
- Ma dhici kadho, ma Deeqaa?
- Waa iyadii .
- Xaggaad joogtaa ? maxaad tirina ? dhowr cisho keliya baad codkeyga illowdaa?
- Maalmo keliya ayaa ka soo wareegtay habeenkii aynu xafladdu ku

kullanay.
Way jidhaa taa, waxayse iila mid aheyd kun sano Deeqay ma rumeysan
- War dheh! ma illaa iyo heerkaa ?
- innaba uma noqon kadho, sinnaba loogama yaabo inay maalmo keliya noqotaa, ma dhici kadho oo ha oran taa, waayo habeenkii aan ku arkay waxay aheyd leylutal qadar, habeenkaa oo lagu matalo kun habeen, waxaan ula jeedaa uu ka kheyr badan yahay.
-Taa hadda innaga daa, se ima aadan weydiin sirta ka dambeysa xiriirkan.
- Wax walba waxaa ka muhimsan sheekadaada, waayo waa nolol, kalmaddaadu waa kheyr, araggaagu waa abshir, inaan xaaladdaada la socdo iyo hadba waxaa ku sugan tahay waxaan dhaafsiisan waxa dunida yaal.
- adeerow, adeerow, cirkaadba i geyne ,innaguna ma nihin kuwo isu dhigma waxaana kuula soo xiriiray inaan kuu sheego inaan kareyn inaan kulanno.
- oo toogashadaa maxaa dhacayna ?
- Wallaahi, shaqadaa igu badan, kolkaan waqti helose aniga ayaa idin la soo socodsiin.
- kaama aynu yeelin, waxaana aan kaa beryi inaadan xitaa berri oran.

Waxay weydiisay bisad dhagar miiran sideed iyada oo qosleysa:-
- ma waxaad ula jeeddaa saa dambe .. saakuun ...
sida wadaad ilaah baryaya:-
- balse maanta , waqtigan aynu joogno hadday suuragal tahay.
- Sardheeye ....
waana markii ugu horreysay oo ay ku dhawaaqdo magaciisa oo qayaxan deetana iyadoo sixi khalad ay kas isugu ridday iyo is yeel yeel waliba si daraami ah :-
- adeer,
isagoo middii hore ku adkeyn buu waxuu yiri :-
- Sardheeye oo qura, waxaana aan ku weydiisan inaad ii oggolaataa inaan kuugu yeero magacaada qurxoon oo qalli ah qaalidii Deeqa.
- waa hagaag Sardheeye, goormaad jeceshahay toddobada fiidnimo ka warran ? sidaa bayna ku ballameen, toddabada fiidnimo iyo Hotel Jubba. halkeedii ayey ku celisay samaacaddii, isna sidoo kale, waxuuse dareemayey inuu dhulka la wareegayo, inuu sida shimbiraha heesa



duulimaad ku dhow yahay. waayo Deeqa ayaa la soo hadashay, ballanna dhigteen.
Xammuul culus oo qalbigiisa ku raran, buu dooni inuu dakaddeeda ku rogo kuna dejiyaa, kulanka uu la wadaagayo baa kaga qiimo weyn dunida waxaa yaal oo idil, indho isuma keenin, hurdo gama kama siin, tan iyo maalinta uu la kulmay, muddo yar ayey aheyd, isagase kaga badneyd kun bilood, ma wax dhici karaa in kulan kedis ah ruux ka yeelo sida kaa Sardheeye, kulan sheeko gaaban laysku weydaarsaday, waa suura gal, waana wax dhici kadha, waayo isagu waxuu ku guursaday yaraan, waayo aragnimo badan isagoo ay ka maqan tahay, afadiisana inkastoo qurux buuraha dillaacin macbuud ku manneystay, waxuu sadrigeeda dugaashanayey muddo labaatan sano iyo dheeri ah, sidaa baynu u adkeyn, inuu raaco dhaan kasto oo ay hoggaaanka u heyso gabar leh qurux indha sarcaadin sida Deeqa oo kale, nin taariikhdiisu tahay uu la wadaagay dumar taa kooban, wax lala yaabo ma aha inuu ka dabo dhaco sokor biyo lagu riday sideed uu u milmo hadduu la kulmo da'yar ilaah ugu deeqay xoog iyo xayiwiyad, qurux iyo bilic, taa Deeqa la mid ah, gabar ka soo jeedda qoys sharaf iyo magac leh nolol sarena ku nool, ilbaxnimo fogna ay u dheer tahay iyo aqoon shishe ee labo af oo caalimi ah.
Sidaa awgeed Sardheeye waxuu ku noolaa bishaa illaa iyo waqtigaa ay la soo xiriirtay nolol madaxeeda majo u rogatay, waxayna u cabiidsatay afkaartiisa si aan la arag lana maqal.
Waxaa yaraaday sheekadii uu la wadaagi jiray reerkiisii, aamus ayuu u badnaa. waxay afadiisii dareentay inay wax un jiraan nafsaddiisa gubaya sida dabka kulul. kurbo xunna ku haya, sidoo kale Sucaad.. badi aabbaheed waa sarxaan, waa u maqan yahay, maankiisu meel kale ka qeylin, kolkay weydiiyaan waxa haya waxuu ugu warceliyaa si kooban inuu aad ugu soo daalay shaqada, wax kalese ka ladan yahay. marnaba Saafi kurbadda jaceyl kama ayan kasin, marnaba is ma oran qalbigiisii baa la xaday, unugyadiisana la degay, waxaa noloshiisa galay naag noqotay sida dhiigga xididdadiisa waraabsha.
gabadhooda Sucaad, lama ayan socon habeenkii balada soo raacday aabbaheed, waxay ku hartay guriga, isuna diyaarineysay toddobaadkii imtixaannada, sidoo kale ma arag lagagamana sheekeyn Deeqa.
Ballantii midkoodna kama soo dib dhicin, illinka ayey ku kulmeen, geesna ka dageen Hoteelkii 'Jubba' Sardheeye iyo Deeqa, waxayna ahyed markii ugu horreysay ay fool ka fool u wada fariistaan.

eegmo ayuu ugu dhaqaaqay labadeeda indhood, farxad bay bandhigayeen, waa ayaan ku weyn nolosha Sardheeye, farxadi ay u idlaatay, istareex u ahaatay, reyreyn ka weyn tiro iyo tayaba ka badan-tuu dareemayey habeenkii oo la aqal galayey afadiisa Saafi-ay u sugnaatay. inan lix iyo toban jidha, waxuu moodayey habeenkaa ay labaatanka sano iyo bilaha ka soo wareegeen, inuu gacanta ku dhigay miftaaxii adduunka iyo aakhiradaba, Saafi shaki la'aan ubaxa xitaa dhalaal iyo qurux dheer, ha yeeshee labaatan sano iyo xoogay bilo ah dharaar iyo habeenba garab jiifay, labaatan sano iyo ka badan arrimo badan dhaceen, Sucaad ay u dhalatay, u dulqaatay muragada iyo tiiranyadii afadiisa, la xiriirtay geeri ku timi waalidkii dhalay, kagana timi shil gaari , iyo tartan joogto ah sida uu u gaari lahaa jago sare xagga shaqada riyadaasoo u hirgashay..

labaatan sano iyo ka badanba isbeddalo badan bay keeni karaan. Sardheeye waxuu hadalkaa nafsaddiisa ku qanciyey kolkuu ku sii jeeday halkay ku ballameen Deeqa, kagana soo tegay guriga afadiisa oo la dhibtooneysa Sucaad oo hargab daran hayey sariirtana la saarneyd.

Sardheeye waxuu is arkay isagoo is leh si uu ugu cudur daaro, xaqna ugu siiyo nafsaddiisa iyo ficilkeeda :-

- maxaan sameeyaa, soo banii-aadan ma ahi, dhoobo ka sameysan. ?!

Kolkay dareentay inuu aad ugu fogaaday fekerkii, iyo waxaa nafsaddiisa ka dhex yeeri, waxaa mar kicin marna fariisan, ayey waxay damacday inay ka saartaa baddaa uu ku hafay, haddana waxay door bidday inay sidiisa u deysaa, si uu hadalka isaga u bilaabo, waxay dooni inay ogaato waxa uu u dan leeyahay, arrimaha uu hayo soo daayo, maxuu ka rabaa ? inkastoo ay iska garneyso - waayo kama baxsana inuu yahay mid ka mid 'iyaga' (dhurwaayadaa badan), se haybad iyo garaad inkastoo uu ku qarinayo, haddaba ha soo socdo, waa hagaag, wey dooni waayo iyadu wey u soo diyaargarowday dagaalka, nafteeda u soo hubeysay laga bilaabo kolkay taleefonka u soo dirtay si ay kaga cudur daarato casumaaddii ay u soo jeediyeen, madaxa ayey ruxday sida ay la hadleyso qof horteeda taagan, waxay ku leheyd nafsaddeeda :-

- waa inaad rag oo dhan aad ka aargoosato, mirka ay hubtayna waxuu ahaa inay gabigiisa milkin doonto waa kaa sida shimbir garab la'dhutin, baahi daran oo uu u qabana ay ka muuqato, waa arrin ay ugu tala gashay, dabiin ay u dhigtay, dowgeedana si wanaagsan bay u garaneysaa waxay garan, waliba si wanaagsan, waxay ka dooni.

hoos ayey indhaheedii u rogtay, deetana mar labaad soo rogaal celisay si



ay naxariis ku dheehdayna kuwiisii ku qaabishay, yaa u sheegase, allow yaa ogeysiiya Sardheeye in dabaal uu ugu socdo fuud kulul . farahiisii intuu kala baxshay kuweedii ku qabtay, iyana way yari ku cadaadisay kuweedii, waxuuna dareemay kalagacal iyo qabow, neecaaw iyo macaan, waana kolkii ugu horreysay oo uu ogaado in farahu sidii dibnaha ay u wada xaajoon karaan. waxuuna lahaa oo uu ku hadaaqayey:-

- waan u dhiman jaceylkaaga, waan u dhiman Deeqa, waan u dhiman.

- ma illaa iyo heerkaa ?

- sida aan kun sano ku garanayo mar qura ah ayayna aheyd kolkaynu kullannay, bal qiyaas bukaan jaceyl iyo xanuun xubbi ruux kun sano la jiifay.

indho jaceyl bay waxay ku tiri iyo hadal hooseeye ah:-

- Sardheeye aniga ...

- adigu maxaad tahay ? ii sheeg gacaliso, ii sheeg billaahi?!!

- gacaliso-aa ma anigaa gacalisadaada ah ?!

- balse nolosheyda, cimregeyga inta tagtay iyo inta ka harsanaba, ee ii sheeg maxaa jira ?!?!

Way yari labo laabisay ama muujisay sidaa iyo xoogaa laba qalbiyeen ah, deetana sida ay heshay geesinnimadii ka maqneyd:-

- isuma qalanno, Jaceylkaadana waa uu iga weyn yahay, mana aha midaan qaadi karo.

Waxuu degdeg ugu jawaabay :-

- dunidoo idil baa ku jecel, waa dhab aan laysku diideyn, marka sidaad u qaadday Jaceylkaa weyn ee adduunka keygana aadan u karin?

- ma dunida oo idil baa i jecel ? Sardheeye?!

- haa, kulligeed, inkastoo keyga ka cuf iyo mug badan yahay.

intuu gacanteeda soo qabtay u soo dhoweeyey dibnahiisa ku daabacay, dhunkusho deg deg ah, deetana yiri sida ruux dambi qiran :-

- waan ogahay inaan wax badan kaa weynahay, hase ahaatee ... Deeqa baa degdeg hadalkii ka kala goysey, waayo dooni meyso duntaa ku xirta inay kala go'do , iyadoo ku leh :-

- ha u laaban oraahdaa, waan ku baryayaa, waayo waxaan u baahnahay qof deggan sidaada, oo hogol da'eysa iyo nicmad dhaqan wanaag igu hareereeya.

- ileys iyo farxad baan ku helay ra'yigaagaasi toolmoon.

waxay ku dhufatay dhoolacaddeyn nal sidi ama falaash Sardheeye cawirray deetana weydiisay:

- ma kaa dhab baa ?!
- oo ma kuula ekahay nin been sheega ?!!
- waxaan dareemay kalsooni weyn qof aan mid la mid ah u qaadin habeenkii isugu kaaya horreysay.
- tabtii oo kale anna, kalsoonidana waa dallada qudha ee ay harsadaan intii xubbi daran iyo jaceyl dhidib aasatay wadaaga.
say waxay ku tiri iyadoo dheeleysa:
- waxaasoo idil waa maxay ? soo kuma oran isuma qalanno ? way dhoolla caddeynaysay iyadoo ka weecineysa dhabankeeda timo dhowr ah oo ay leedhu dheelineysay, kuna leh hannaanka iyo habka kuwaa ilaah maal iyo mulkiba ku fatahay :-
- waan iska kaftamayaa.
Sardheeye intuu kala batay ayuu ku sigtay inuu baalal yeesho iyo inuu sida balanbaalistii hadba laan ku boodo iyo geedaha Jubba.
Waxuuna ku yiri sida ruux Janno loogu bishaareeyey :-
- Waxaan qabaa dareen ah inaad tahay hadiyad samada layga soo diray, noqon doontidna hogoshaa da'dee hillaaca bixisa, in yar oo aamus ah dabadeedna yiri :-
- Ilaah baanse u mahad celin
- Kaaga mahad celin shacuurtaa wanaagsan xaggeyga
- Dabcan, mahad allaa leh.
Saacad dhan buu la joogay, qof kasta uu kursigiisii fadhiyey.. saacaddaasoo oo uu u sharxay wax allaale iyo waxii maankiisa ku ordayey, laguna soo koobi karay labo eray oo qura inuu jeclaaday, noolaan kareyn la'aanteeda.
oraahdaa waxay u fasirataa inuu dooni, taana way garaneysay, horey bayna ugu soo diyaargarowday, hubka ay kaga hortegi laheyd isku soo dabaridatay, booraan hadimo iyo godba u qodday, dabiin u dhigtay, kolkay ogaatay inay halka ay doonto u wadi karto. shey walibana qiimahood, way bareen taana, una dhigeen darsin la xiriira . Se nin leh afo quruxdeeda dayaxa madoobeyn, cadceedda labo u qaybin, buuraha kala dillaacin-Deeqa ma oga dabcan in Saafi 35 tii dhowr toddobaad u dheer yihiin, inkastoo muuqaalkeeda dhallinyarinno, xoogga 30 lays oranyen wey ka weyn tahay. Deeqa habeenkii ay aragtay waxay u qirtay inay tahay miro kuwo ugu macaan, se ninkaasi waxaasoo wanaag ah ilaah ku galladeystay uguna deeqay baa iyada dooni, dhareerkana u daadin.. waa nooca marka lagu tilmaamo kuwa indhaha isku heysta, maadaama taa ay



tahay tilmaantiisa maadaama uu doonayo, haddaba ha baxsho meherkeeda, meherka saacadaha uu la caweyn doono.. waa inoo la baxaa Sardheeye qiimaha waxa uu doonayo. miyeynan aheyn? inkastoo yihiin waxaan lacag lagu qaddirin, haddaba ha baxsho waxuu heli karo.
Waxey dareensaneyd inuu noqon doono kubbad xaggay doonto ay u gani karto.
Waa qiimo aan sidaa qaali u aheyn Sardheeye uu u dhiibi doono meher ahaan si uu ugu guuleysto.. Saacadda ayuu eegay mise waa wagti dambe, intuu kacay ayuu si deggan ku yiri :-
- Waa xilligii aan tegi lahaa, iyana intay istaagtay ku tidhi si ay jaceyl been ah ku subagtay :-
- Ma degdeggan ?
- marnaba ma jecli inaan kaa ag dheeraado, taana waad ogtahay iyo sidaad u noqotay hawada iyo biyaha aan la'aantooda noolaan karin.
- ma ka dhab baa ?
- balse indho la'aan baan ka dooran inaan ku waayo, deeta intay Deeqa labadeeda gacmood kor u taagtay billowday inay u toosisaa karafaatahii u xirnaa iyadoo ku leh :-
- haddaan hadal ku waangsanahay waxyaabo badan baan oran lahaa. foolkeedii ayuu ku qabtay labadiisii calaacal, labadiisii indhoodna kuweedii u dhoweeyey isagoo ku leh :-
- war dhafoor buu ku yaal
kaddib si asluub leh intuu isu soo goday buu waxuu dhunkaday labadeeda indhood, deetana dhabbanadeedii, dibnaheedii ayuu ku soo dhowaaday si aayar ah isagoo ugu soo socda iyana way garaneysay inuu u soo dan leeyahay, gogol dhigan, jaceyl iyo kuleyl daran uu u gocan, waa cayaar ay dhab u baratay og tahayna inay iyada ku guuleysan waxay aragtey hal il biriqsi gudaheed dibnahiisii oo kuweedii dul saaran. faraha ayey uga qaadday, kolkuu aad isugu duubay, moodayna inay isu dhiibtay ayey ka garab baxaday, si deggan ugu siibatay, macaankii iyo farxddii uu dareemay baa mar wada damay, kana baabaay intuu yaabay buu sida ruux bukaan ah ugu dhawaaqay magaceedii :-
- Deeqa, Deeqa ...
hoos ayey madaxeeda xishood awgi ugu dhigtay, waxaa qayb foolkeeda ka mid ahaa qarshay timaheedii jilicsanaa, waxay ula muuqatay sida lowxad gacan lagu qoray fannaan weyn uu sawiray oo aan dhigaal laheyn waxaa uu maqlay cod dhuuban oo ku leh :-



- Sardheeye,
- maxaa kugu dhacay gacaliso, ?! buu degdeg ku yiri isagoo neeftuuraya.
- Waxaad mooddaa bay tiri , inaynu is illownay, xarriiqdii inoo bannaaneydna dhaafnay.
- Laakiin, waan ku jeclahay, waan kuu dhiman Deeqa , sideen kuugu caddeeyaa.
- Uma baahna caddeyn, shakina taa iigama jiro.
- Haddaba waa maxay isbeddlekan kediska ah ?
- Mar labaad ayey hoos wajigeedii u rogtay, timaheediina ku soo gaddoomeen iyadoo si hoose u leh :-
- Waxaan dareemay sidaan kuu sheegay inaynu is hilmaamnay, in yar oo aamus ahna dabadeed :-
- Ma i rumeysan dhaar la'aan ? mise waa inaan kuu dhaartaa si aad i rumeysato?
- malaa'iguhu been ma sheegaan.
- Waxaad tahay ninkii labaad nolosheyda giddigeed ee i dhunkaday. waxaan u leeyhay ninkii labaad si aan been kaga fogaado, kan horena waxuu ahoo ninkeyga oo aan hadda ku xirnahay.. ha yeeshee.. sidaa bay dacal qisadeedii ugu martay. mar labaad bay wajigeedii hoos u dhigtay.

Sardheeye ayaa gabigiisaba naxariis ku beerantay, waxuuna ka baryey inay iska illowdaa dhacdadaasi oo dhan, una furtaa nolosheeda baal cusub oo nadiif ah.
Waxuuna ka soo tagey, isagoo ayan farxadi ka maqneyn, rajooyin iyo ididdiilooyin dhab ah dareemi iyo inuu siduu doono ula caweyn doono uguna dhex dabaalan doono sadrigaa qabow ee Deeqa, raaxo buuxdana ku qaadan doono labadeeda gacmood dhexdooda gooraan fogeyn.
Aroor Jimce ah ayaa waxaa miiska quraacda ku kulmay Sardheeye, iyo afadiisa Saafi, iyo gabadhoodii Sucaad.
Waxuuna u soo jeediyey su'aal ah inay mid kasta oo iyaga ka mid ah sheegataa waxay jeceshahay oo ay laabta ku heysay. reyreyn iyo farxad bay la qosleen. waxayna dalabaadkodii isugu soo biyo shubteen, waxaan ka badneyn seddex kun oo shilin oo uu isla markii Sardheeye u tiriyey, iyana goor casar gaab ah intay suuqa xamar weyne ula dageen waxay ku hammin jireen oo idil taksi ka soo buuxsadeen.
Sardheeye arrimo jaceyl aad u kulul baa hoggaamin, waxuu iska dhaadhiciyey inay tahay Deeqa qaybtii ilaah u qoray ee ka soo dib

dhacday, in nolol la'aanteeda suura gal ahayn, wuxuu u soo bandhigay Guur, iyana aqbashay, deetana shardi ka dhigtay kuna xirtay inuu furaa afadiisa Saafi ka hor muddada afarta sano ah ay isaga fasaqi kadho ninkeeda hore, wax yarna ay ka dhimman yihiin.
waa shardi ku adag, qasabse ay tahay inuu u hoggaansamo si uusan u waayin jannada Deeqa ee qabow.
sidaa ayuu gurigii degganaa aamminka ahaa, udabbadiisu taagnaayeen labo iyo labaatanka sano, joogtada u dhiigayey muxubbada iyo kalgacalka isu beddelay tiir ka mid ah tiirarka naarta jahannamo. aad iyo aad iyo aad buu Sardheeye isu beddelay , caadi ayey u noqotay inuu gef abuuro dhaliyana si qofkiisa ciqaab iyo cadaab adag uu kaga abaal mariyo, waxuu u gogol dhiganayey arrin weyn oo uu damacsaanaa. marna isma oran Saafi ninkaadii lagaala wareeg, illaa ay Sucaad ku kedisay habarteed markay ku taabatay war ay ka soo xigatay gabar ay arday wada ahaayeen ahaana inuu aabbaheed xiriir qoto dheer la leeyahay gabar ay daris yihiin soortana ka ah "Somali Airlines".
Yaab, amakaab, iyo argagax, habeenkii xafladda ayaa horey kaga so dhacday, Saafi degganaanta ilaah ku galladeystay awgeed baa waxaa ku soo dhacay maahmaahdii Hubsiino Hal Baa La Siistaa.
Saafi waxay qaadatay cinwaankii guriga naagtaa xadday qalbigii ninkeedii kulanna waxuu seddexdoodii kaga dhex dhacay albaabka aqalkii Deeqa, indhaheedii ayey ku aragtey Saafi, shaahid tiri, sheekadiina ku yaqiinsatay kuna shaki baxday, kolkay aragtey iyagoo dhunkasho dheer ku tegay. hadal ayaa ka soo bixi waayey, intay gadaal u guratay bey orod jaranjaradii kaga degtay iyadoo barooraneysa, aqalkeedii timi iyadoo ilmo dhiigeysa, Sucaad ayaa waxay ka shallayday maxaad ugu sheegtay hooyadaa warkaa madow!
waxaa sida cadceedda ahaa inuu qarax dhici, u horseedi doona burbur guriga oo idil waqti uu dhacaba.;
galab khamiisaadna, waxuu ka tegay Sardheeye gurigiisii goor casar ciirsi ah, habeenkiina ma uusan soo hoyan, kolkii ugu horreysay bay aheyd ee uu debed seexdo isla subaxdeediina waxay Saafi gacanta ku dhigtay oo loo keenay warqaddii furriinka iyo nafaqad sano ah ee uu u soo qiimeeyey labadooda; inkastoo ay saluugtay Saafi dareentay inay kaga bixi karin dhibaha iyo dalabaadka nolosha ee badan.
Maalmahu is dabajoog waxay u maraan Saafi, iyo gabadheedii Sucaad nolosha mashaakil waxay hadba ku kediso murugo illaa ay u muuqatay



inay sidaa ku socon karin, waxay talo habartii ku goysay inay arrinteeda u bandhigtaa oo ay talo iyo toogo weydiisataa qaalli Axmed Ismaaciil.
Subax Talaado ayeyna u qasadday nasiibdarro ma joogin waxayse illinka qaaliga oo ay ku dhagganeyd warqad ogeysiin ah inuu safar ku maqan yahay ku kulmeen nin isna qaalliga doonayey,
waxay su'aalo caadi ah isdhaafsadaan ugu dambeyntii is baray una sheegay inuu ahaa danjire hore lana yiraahda Durraan haddana ganacsade, wakiil uga ah Soomaliya iyo Bariga Afrika shirkado badan oo caalami ah waxuu ka codsaday inuu gurigeeda geeyo fursaddaa wanaagsanna u oggoloaato basaska iyo siteyda ayan isku howlin, xoogay kaddib ayey iyana ku raacday.. waxuu la tegay gurigii, bartay gabadheedii Sucaad, waxaa dhexmartay giddigood sheeko xiiso leh, farxad ayey wada dareemeen iyo inay maqsuud seddexdooda ka wada yihiin barashadaa kediska ah. iyadii baa korodhay, gaadhay muddo gaaban gudaheed heer sare.
Durraan maciin weyn ayuu u galay reerka, wax kasta u qabtay, u fuliyey dalabaadkoodii o dhan iyo ka badanba, asluub iyo u muujiyey adaab aan la arag iyadoo kale illaa ay ka dabo dhaceen.
Waxaa deeta xanuunsaday Sucaad, taana waxay keentay inuu joogto gurigaa u yimaado iyo maalintii seddex jeer isagoo dhakhtarro kale duwan keenaya iyo hadba waxii loo baahdo, waxay habeen kasta qolka fadhiga isaga iyo Saafi ku faaqidi jireen caafimaadkeeda, waxuu fadhiyadaa gaarka ah la yeeshaba Saafi gaar ahaan kolkay Sucaad seexato illaa uu dareemay shaki la'aan inay bislaadeen mirahii geedkii uu abuuray, xilligii goosashdana joogaan.
Habeenna iyadoo sagootineysa ayey waxay u taagtay salaan, waxuu cabbaar gacanteeda hayo ayuu deeta xagga sadrigiisa u soo dhoweeyey gaaddada ku qaaday haddana isagoo si hooseeya ah u leh:-
- Saafi
waxay si ka daran iyana ugu jawaabtey
- haa Durraan,
Daqiiqado ayey caalam kale u galeen, deetana kolkuu is yiri Durraan heshay sidaad dooneysay ayey aayar intay uga siibatay in xoogay ah u jirsatay una tilmaantay inay qolka fadhiga ku noqdaan isagoo leh:
- Saafi waan ku jeclahay, waan kuu dhiman,
Qolkii ayey wada tageen, hordhac gaaban kaddib oo ay nafteeda ku sharaxday iyo siday u tahay naag sharafteeda leh, si cad aan leexleexad



lahyn ugu sheegtay in waxa uu ka doonayo sinnaba ugu suura galeyn waddo xalaal ah iyo guur ma oyee, haddaad diyaar u aheyn bay ku tiri waa inoo wanaag iyo walaatinnimo oo qura.
Durraan dab baa gubi, olol baa shidi, jaceyl baa waali, isna Saafi uu u hayo, diloon rabana, waxuu ka fakaray cabbaar arrintaa ay u soo bandhigtay, deetana yiri :-
- hadda ma dhigannaa aroos ?!
- may, waa inaynu helnaa oggolaanshaha Sucaad kolka hore ayey ku warceliday.
Sidaa baa waxaa ku dhacay aroos yar oo aan sidaa u buuq badneyn koklay O.K ay saartay Sucaad.
Muxubaddii iyo kalgacalkii sidoodii iyo ka badan bey ugu soo laabteen, boogtii iyo nabarkii bogsadeen, cidladii iyo halkii u banneeyey Sardheeye.
Durraan aad buu deeta u degay raaxo tan ugu sarreyso helay, xubbina kan ugu saamisan, xannaan kan ugu suubban.
Maansha la yiri wanaag adduun waxuu ku jiraa adigoo helaa marwo wacan se Durraan ma mudan yahay Saafi oo kale oo dumar oo idil halkii malyan mid laga heli iyadoo kale , siday ahaataba guud ahaan noloshii reerka way is beddeshay, farxadduna waxay sida nal oo kale uga ifeysay uguna soo noqotay Saafi iyo gabadheeda.
Sucaad waxay Durraan ka dhigatay gelisayna maqaankii aabbaheed, Waxaa af libaax galay hamuuntii,dhibahii maalmo ka hor ay ku jireen waxaa bogsaday boogtii Sardheeye iyo dhaawacii uu gaarsiiyey qalbiga afadiisa iyo gabadhiisaba. Waxaa uu ula muuqday Durraan ruux intii la doono nadiif ah xumana ka meeran.
Se Durraan waa nooca dadka fransiiska ah ay u yaqaaniin balanbaalista oo ay ula jeedaan ubax keliya kuma ekaado ee waxuu ku hakadaa inta dhacaanka ay ku jiraan deetana mid kale ka baadi doontaa.
Dhowr bilood baa weydaaratay oo keliya kolkii ay ka baabá een xiisahii Saafi iyo xubbigii darnaa uu u hayey. Waxuu bilaabay inuu u soo durkaa xagga gabadheeda, dabcan ragga noocaasi ah xishood kala guure, xilna ma qabto, yaase ka joog yiraahda, sharaftu waa hanti aan dhammaane.
Waxuu ugu soo dhowaanayey si digtooni leh, iyada un baa u muuqatay baryahii dambe, ishiisuna ku maqneyd
Habeen Arbacaad iyaga oo ka wada casheynaya Sucaad, Saafi iyo Durraan baarka Al-Jazirah baa waxay Sucaad u sheegtay Durraan inay xafiiska ku soo mari doonto.

Wuu u sii gogol dhigtay arrintaa shaqaalahii fasaxay, iska dhaadhiciyey inay diyaar u tahay.

Waxay ugu soo gashay xafiiska subaxii khamiista aheyd iyadoo malaa, ig buuxda ah, qalanjo dhan, onkod, hillaac iyo biriq baa tillaabada ay qaaddaba la dhacayey.

Tani ma gabar baa caadi ah ? bal naasaheeda eeg, sadrigeeda buuxa, timaheeda, dibnaheeda, suuxdin ayuu ku sigtay ma wax lala yaabaa taa? ma aheyn wax lal yaabo kolkay ka dhaceysay ragga Nooca "Balanbaalista" ah, shakhsiyaad daciif ah iskood dunida isugu ciqaabay.
sidaa buu ahaa Durraan maalintii Deeqa ugu horreysay.
Sidaa buu ahaa maalintii hooyadeed Saafi ugu horreysay.
Wuu soo dhoweeyey u sheegay in shaqaalahii oo dhan awgeed uu fasaxay miskiin yar weeyaan ma garaneyn ujeeddadiisa, waxuu ku been maaweeliyey inuu waxbarasho meel kasta oy doonto ugu diri doono, sannadka ugu dhimman bikaalarayooskana ay ku socon doonto "Jacquer" uu u iibin doono.
Run bay ka moodday Sucaad hadalkaa ee uu ku waddo xaaranayey, farxad badanna ka qaadday.
Durraan deeto intuu kacay buu armaajadiisii waxuu kaga soo saaray katiinad dahab ah shucaac iyo ileys bixineysa isagoo ku leh.
- katiinad ka qaalisan ma jidho waxay iigu fadhidaa 10,000 oo doollar waxaa xirta xaasaska boqorrada iyo amiiraadka? adiguna soo amiirad ma tihid.
Sucaad waxaa qaaday qariisad kasta oo ku jidha gabar aabbaheed Jaceyl xad dhaaf ah u muujiyey, waxayan fileynna u keenay, intay ka soo kacday kursigii ay ku fadhiday ku soo boodday Durraan si ay kaga mahad celiso.
Waxayse Dareemayaasheedii mar qur ah shaqadii ka wada joogsadeen, waxay dhiig iyo ficilo laheydna bilaabeen inay u soo kala tartamaan foolkeedii kolkay aragtay Durraan oo qasab doonaya inuu dibnaheeda sida nacnaca oo kale u murursado, intay ka fara baxsatay bay gees qolkii ka istaagtay iyadoo gariiri ilmaduna hakad láaan kaga qubanayaan.
Sucaad marnaba sidaa kama filan Durraanna isma oran sidan bay yeeli waxuu is lahaa waad bislaysatay waa raalliyo.
Maxaase u talo ah, ma ceeb baa dhimman? ma sharaf baa u taal? hadduu afadiisa gabadheedii damcay, waa nin gabdhiisii damcay illeen ceeb looma dhinto.



Waxuu bilaabay inuu sabaadiyo ka codsaday inay arrintan qariso haddii dhib iyo qaxar kale hooyadeed ayan la dooneyn.
deetana intuu shukumaan siiyey yiri ilmada wajigaada ka muuqata iska Soo meyr si aan lagaaga garan, iina dambi dhaaf, sidii buu ku soo qaaday, intii ay waddada soo hayeenna, waxay ka codsatay inuu ka cafiyo aqbalidda katinadduu u hadiyeeyey.
Sucaad maalmahii dambe way joojisay inay qadada wada cunaan hooyadeed iyo ninkeeda, waxayna sabab kaga dhigtay inuu ku soo food leeyahay imtixaan adag.
Waxaa deeta ku adkaatay inay guri wada degganaadaan iyada iyo Durraan, ficilkii aabbaheed waxba ma aha kolka loo eegaa kan Durraan.
Waxay ka dhammeysay Sucaad saaxiibteed Sareedo inay la degtaa.
Sidaas bayna kaga soo guudhay hooyadeed kolkay si dhib leh kaga dhaadhicisay inay sannadkii ugu dambeysay ku jidho ee jaamacadda, lagana doonayo dadaal badan iyo akhris joogto ah, taana ayan u hirgaleyn illaa ay saaxiibteedaasii la degto ma oyee.
Dhib iyo qaxar bay·Saafi dalabkaa gabadheedaasi ku yeeshay, iyadoo dhab hadalkeedii moodeysay. Durraan bayse u caddeyd sababta.
Saafi habeennadii dambe oo dhan iyo siday gabadheedii u guudhay hurdo si fudud kuma ayan heli jirin.

Sucaad habeenna guriga inay ka dhexdaa daaye kama soo daahin.. waxay gabdhaha saaxiibbadeed ah ku dacaayadeen jireen inay diggaaga la xarooto.. ka guuriddaa gurigoodiina waxay aheyd arrin ay daruufo qasbeen iyo Durraan falki.. waxayse ka guratay miro kuwa ugu qaraar.. dhibaatooyin aan la koobi karin .. waxaa yaab iyo cajab ku riday sida saaxiibteed oo muuqaalka guud degganaan iyo wanaag bandhigi u qarsoon tahay saaqidnimo aan dhigaal laheyn ... waxaa habeen walba gurigeeda isugu yimaado caasi oo idil halkaasoy ciyaar, heeso iyo sigaar ku mug buuxshaan meel walba.. waxay isku dayday Sucaad inay waanisaa saaxiibteed, dunidaas iyo waddadaa xunna ka weeciso.. nasiib darro wax guul ah kama gaarin arrintaa...

Sareedo waxay aheyd gabar u go'doontay xumaan se degganaan ku qarisa maadaama ay nafsaddeeda dulliysayna ciiddeed waxay aheyd kolkay waddadaasi qof ku soo riddo, aad waxay ugu dadaashay inay beddeshaa gabadhaa nadiifta ah, xiddigaha fog ayaase taa kaga dhowaa..

Illaa uu maalin u yimid wiil kuwaa ay wada duulaan ka mid ah una sheegay inuu u kulul yahay gabadhaa saaxiibteed ah Sucaad la yiraahdana. iyana waxay u sheegtay inay habeenka dambe guriga u firaaqeyn doonto markaasina waxay ku tiri waa adiga iyo shaddaaraddaa.

Baashi waxuu calanwale u ahaa intii sagsaag ahi oo dhan, guul darrana mataano bay ku wada dhasheen, mid ku lammaansan bay aheyd tan iyo beryahii dugsiga. Waxa ugu weyn ee maalintii u qabtaa waxay aheyd waddooyinaa caanka ah oo uu marmaro, sheeko aan isbeddelin la taagnaado la xiriirta taa waan la tuntay iyo waxaan innaba murti laheyn waxna ku ool.

Waxuu habeenkii yimi gurigii Sareedo oo ay Sucaad oo qura joogto, waxay ka fakareysay halka ay ka aadi laheyd gurigan dulleysan,, isagii ayaa u soo galay, weydiimo badan ku waalay isagoo hadba u soo dhowaanaya iyana ay ka fogaaneyso, illaa ay ku qasabtay inuu xoog isticmaalo. dagaal xun dabadood oo dhex marayna waxuu ku dhammaaday inay halkaa Sucaad ay ku weydo wax gabari xafidato waxa ugu sharaf badan ugubnimadeediina af libaax gashaa... dhaawacyadii ay gaarsiisay awgeedna debedda uu ku soo xooro iyadoo ilma dhiigeysa.

Waxaa isugu soo baxay darskii oo dhan.. mid ka mid ah ayagaana hoy siiyey habeenkaa.. Toddobaad dhan bay waxay Sucaad aheyd sida qof naf ayan ku jirin ficilka lagu sameeyey awgeed.. jabkeedana iska qarsatay aabbaheed u horseeday.. Gurigan cusub ay joogtay dadka degganaa waxay ugu muuqdeen kuwa wanaagsan asluub iyo adaab maciinsada, illaa ay kedis ku ogaatay sheeko iyaga ka dhaxeysana ka heshay inay qaadka iyo xashiishada soo waaridaan kana mushtaraan.

Sucaad deeto waxay go'aan ku gaadhay inay isla subaxnimada ka guudho intay goori goor tahay ceeb iman tuhmaddana la wadaagin, mase garaneyn meelay abbaarto oo ay wajhadda siiso.

Waxay aheyd maalin Sabti, waxuu Durraan marayey waddada 30 ka, ku socday orod aad u sarreeya, waxaa si kedis ah ugu soo baxay bas Shareero ah, kama uusan qaban karin.. waxaana halkaa ka dhacay shil xun. Durraan waxaa loola cararay cisbitaalka Madiina asagoo dhiig badane ka



bixi. waxaa lala gaaray daawooyin, deeto loogu cid diray, saafi arrintaana lagu wargeliyey.. Waxaa waddadeeda ahaa Sucaad oo intay horay ay u soo martay, isbitaalka naxdin iyo cabsi la yimaadeen.. waxba ma ayan u qaban Durraan daawooyinkii, waxuuna ku dardaarmay nafta isagoo ay ka sii baxeyso in hanti iyo guryo waxuu leeyahay iyada iyo gabadheeda Sucaad u kala bar yihiin .. Waxuuna isagoo naftu ay sii dhaafeysa Saafi u sheegay gefkii uu ka galay gabadheeda oo aheyd arrintii ka dambeysay inay guudhaa.. Sucaadna cafis iyo masaamax weydiistay . halkaasoo ay naftu ku sii deysay..

Habeennadii dambe waxay Saafi hadba soo xasuusan jidhay khaladkii iyo gefkii Durraan iyo Sardheeyaba. Ma ogase markaa in Sardheeye uu kumaankun meyl Soomaaliya uu u jiro meel ka fogna kaga maqan yahay.

Sardheeye waxaa loo magacaabay Xoghayaha Guud ee Golaha Maamulka Shirkadda, si uu xilkaasi kaga soo baxana waxaa loo gartay in sannad tababar ah England loo diro. Waxaana ku dhiirra geliyey Deeqa inuu yeelaa oo uu oggolaado deeqdaa waxbarsho inkastoy ay ku adkeyd inuu iyada ka dhoofo, habeen qura kama arag la'aan karin... Way ku qasabtay, sidaa buuna ku dhoofay kolkay kala hartay gaarigii Argentada uu lahaa iyo qalab kale oo qaali ahaa. tan iyo maalintii uu cag dhigay London iyo waxii ka dambeeyey, waxuu u soo diri jidhay taleefon. aad ayaa looga dareemi jiray urugada jaceyl.. kurbadiisna markaa looga kasi jiray .. Sidaan horay u niri Sardheeye waxuu isu tusay Deeqa se aan ruux qeyrki isu tusinba.. fakar xaggeeda ah ayaa cuntadii ka gooyey.. cishqi gabar aan ku heer aheyn buu la caatoobay.. madaxiisii la cirreystay.. jaceyl oday galay ma fududa.. ma fogana xitaa inuu dhiig galaa haddii uu caqliga ka boodo.

Waxuu kow iyo labo tirinayey maalintaa ay afartaa sano ay u dhammaan doonto Deeqa si uu u guursado, naftiisana ugu soo noqoto.

Deeqase waxaasiba kuma fakareyn .. ninkaasi isaga ahna waxuu ugu muuqday kumaankunkaasi kalmad kolkay ka helaan kun maalmood ku ciida .. waxay isaga gudaneysay shaqadii sidii looga tala galay iyo si ka wanaagsanba.

firfircoonidii hore ayaa ku soo laabatay ... boogahii sabanka uu u geystay way iska yari illowday .. Saafi iyo gabadheeda Sucaad iyana hanti ayan fileyn baa mar kedis ugu soo habsatay, gawaari iyo guryo ayan ku soo jeed riyoon baa lihidooda noqotay ... adeegayaasha gurigooda darsin darsin u joogeen.. boogtii sabanka iyo dhaawacii maalmaha wada illoobeen..

Maalin iyagoo guriga jooga ayaa jaraskii lagu soo garaacay .. albaabka ayaa waxaa furtay Saafi, mise waa Deeqa .. Cajab allah.. Yaab dheh..

– Galab wanaagsan Deeqa, soo dhaaf, ayey Saafi ku tiri, si aad u deggan. Kolkay soo gashay kaddib Deeqa tiri :-

– Waxaan ka xumahay inaan idinku soo wargelin booqashadeydan, ballan horena inuu dhaxeyn.. se cadaab damiir baa i hoggamineysa.. gef weyn baan idinka galay.. ciil aan rag u qabay iyo bir aan dhurwaayadaa u qaatay baa Sardheeye haleeshay.. ushii munaafiq loo wadaa muuminkey ku dhacdaa.. dhibaato kolley idiin horseeday.. ee waxaad doontaan igu xukunta.. xaal waxaad doontaan iga qaata.. Deeqa way ooyeysay.. iyaguna aamusinayeen. waxayna u sheegeen inay wax dembi ah u heysan, walaashood oo kalena tahay.. iyana waxay ku tiri :-





- hadalkaa dhabtiisa waxaan ogaan karaa, niyad samaan heli haddaad iga aqbashaan ood iga gaddoontaan alaabtan oo uu lahaa Sardheeye iina hibeeyey.. sidoo kale gaariga uu iiga tagey.. waana kan furahiisa.. cadaadin Deeqa kaga timi awgeed waa ay ka yeeleen.. heshiis wacanna waxuu dhex maray seddexdoodii.. waxay ahaayeen, isagana wanaagsanaayeen kuwaa wada dhashay xitaa.. waxii maalintaa ka dambeysayna joogto isu soo booqan jireen.
Deeqa waxay dareemeysay in khaladkii laga galay khalad ka weyn ku saxday,guri yar oo aammin ahaa ay burbur u horseedday.waxay warqad u qortay Sardheeye ay ugu sharaxday arrintii ka dmabeysay inay la xiriirtaa oo aheyd Aargoosasho, wax jaceyl ah ayan u heynin .. se inay marriin habowday, usheediinna ruux aan mudneyn ku dhacday oo ah Sardheeye.

inay ku wareejisay alaabtii uu u hadiyeeyey, iyo gaarigiisiiba reerkiisa. inuu cafiyo .. waxii dhibaato ah ay u horseedday .. waxay boostada geysay goor fiid ah, gurigoodiina deg deg ugu soo laabatay .. waxay isu diyaarineysay safar hor leh.. waxay aad ugu faraxsaneyd dembiyadaa ay iska meertay iyo muddaddii afarta sano oo dhammaad ku dhoweyd.

Baraf baa dhacayey yar yar, hawadii qurux ugu deeqay, bilic ku hagoogay, nafuustii hamuun tiray, qaluubtii haqab tiray.. hannaan dhan iyo hab samaan magaaladii ku dahaaray..
rikaabkuna waxay ahaayeen kuwa baradka iyo qabowga jira laga dareemi karo, iyagoo markaa soo gudbayey hawada dalka Talyaaniga diyaaraddu waxay ku soo socotay magaalada Muqdisha, labo qof ayaa wada saaran, maalin qura kulmay, xasuus wacan ku kala tegay isma ayan arkeyn, sababtu waxay aheyd werenbag oo foolkiisii koofiyad ku daboolay iyo Deeqa oo yari xanuunsanyd, diyaaraddana ku dhex socsocan. illaa ay diyaaraddii soo caga dhigatay gegida Muqdisho.
Werenbag waxuu ku degay Hoteelka Al-Curuuba, kolkuu maalin joogay, ayuu taksiile ka codsaday inuu ku raadiyo, guri uu khariidadiisa watay ahaana kii Shaafici .. si uu waalidkii dhalay kaga gaarsiiyo fartiimo af ah iyo waraaqo uu ka siday.. waxay raadshaanba waxay ku heleen dhibaato, taksigii waa uu iska fasaxay, markuu gurigii helay.. waxuu garaacay illinkoodii .. dhowr ilbiriqsi kaddib baa waxaa ka furay qofkii uu muddada raadinayey Dareemayaashiisii oo idil baa kacay, qandho heysay baa deysay xoog cusub baa soo galay.



wuu rumeysan la'yahay waa Deeqa qofka ku hor taagan, ma muuqeedaa mise waa indhahiisa, waxuu is weydiiyey inuu riyoonayo iyo in kale, waxaa ka soo baxay hadal ah:
- Qaali ma adigiibaa ? ma dhici kadho, suuragal ma ah.
Deeqane, dareemayaashii jirkeeda baa mar shaqadii ka wada joogsaday, waxaa ka degi waayey Werenbag weeyaan ninka hortaada taagan ee guriga soo garaacay..
Waa yaab, waa cajab allah, malaha waan riyoon.
Qaali, Werenbag ayaa isku mar labadooda ka soo wada yeertay, salaan diirranna is dhaafsadeen, guriga Deeqa keliya ayaa joogtay dadkii kale wey wada maqnaayeen, wey fariisisey dabadeed, warka i isii tiri, iyo sida uu guriga ku soo helay, waxuu u sheegay inuu iyada halkan ku ogeyn, kulan kedis ahna arrintan tahay, inuu reerahan waraaq uga siday inan ay dhaleen Shaafici la yiraahdo, khariidad tilmaanta guriga xambaarsanyd ay ku saacidday inuu guriga helaa isagoo kala kaashanayey taksiile soo qaaday waxaanse la yaabbanahay isagoo Shaafici ahaa saaxiibka keliya aan ku dhaarto, sababta uu iiga qariyey inaad macrifo tihiin, waxay warcelin ahaan Deeqa u siisay:
- marka hore macrifo ma nihin, oo waa walaakey da'dii iga yareyd.. marka xigta anigoo aaminsanaa in haddaad damacdo raadinteyda, shirkadda aad ka bilaabi, ayaan waxaa ku siiyey magac shirkadda layga yaqaan oo ah Qaali.. haddaba khaladka aniga ayaa leh oo waxay aheyd inaan ku siiyo magaca kale ee aan leeyahay ahna Deeqa..
Werenbag yaab baa ka soo haray.. waxuu is weydiiyey xaalka adduunyo siduu yahay, nin waliba oo noolse maxaa aragti u laaban.. Shaafici iyo Deeqaa walaala ah marna isma oran.. isagana hadduu ogaado in gabadhuu habeen iyo dharaar weydiin jiray walaashi tahay yaabku darajadee buu ka gaari..
Arrimo kala duwan ayey deeto ka wada hadleen, kaddib ayuu intuu waraaqahii ku wareejiyey, baar Guuleed ku wada ballameen 9:00 habeennimo. 8:00 dii markay aheyd Werenbag waxuu joogay baarka, dhowrayey Deeqa, fadhiyey keligi gees gaar ah, dayaxa kaamil buu ahaa, nalal kala ceyn ah, cagaar kala duwan, cows yar yar miyuusigga diirran baarka uu lahaa baa qof waliba daqiiqadahu sahal ku dhaafayeen 9:00 kii oo gow kolkii aheyd ayey Deeqa soo gashay baarkii, wey dhoolla caddeyneysay waxaa u muuqday Werenbag, halkii uu fadhiyey ayey soo gaartay si xaraarad leh ayey isu salaameen..

Waxuu Werenbag gaddoonsiiyey Deeqa inta ayan fariisan xirmo ubax ah, iyo sawirkeed oo gacan lagu dhigay, waxuuna u raacshey oraah ah jeceyl fog iyo kalgacal dhidib aastey ayaa kuu wehliya oo aan xambaarsanahay.
labadooda qofba waxuu hayaa qiso ku weyn oo uu doonayo inuu u warshaa kan kale. qisooyinkaa oo dhacay is araggoodii kaddib. adeeegahii ayaa casho keenay, Deeqa ay dalabtay, kolkay ka farxasheen, faallo yar baarka ka yiraahdeen ayaa waxaa soo dhex galay in yar oo aamus ah.
Deeqa ayaa waxay hadalkii ku furtay su'aal ah iiga warran waxii amuuro iga dambeeyey, in yar ayuu amuusay deetana yiri :-
- Deeqa waxaan kaaga sheekeyn qiso runtii murugo leh ku dhacday wiil Soomaaliyeed iyo gabar Jarmal ahoo aabbaheed 13 jirkeedii uu geeriyooday, lana nooleyd hooyadeed ilaah uu cudur ku ibtileeyey iyo jirro sariir ku xoortay..
Waxuu xiriir ka dhex billowday gabadhaa Jarmal inan Soomaaliyeed oo ay bas gudahi isku barteen, aqalkoodii ayey bartey, halkaaso ay joogto uga cabbi jireen ceelka jaceylka, waxay waadiga cishqiga ka dhamaan illaa ay gabadhii uur qaaddey, kolkey u sheegtayna inankii waxuu ku yiri:
- waxba ma aha waynu is guursan dhowaan, kolkaan Soomaaliya ka soo laabto oo aan labo cisho kaddib u duuli fartiin deg deg ah oo aan ka helay Aabbahay awgeed, waxaanse ku maqnaadaa waa 2 toddabaad ugu badnaan sidaa buuna ku dhoofay iyaduna ku sagootisay, soo noqod wacan u rajeysay sannad.. labo.. saddex. iyo toban ayaa ka soo wareegtay muddadii labada toddobaad uu yiri waan ku soo laaban, iyaduna ka daashey qoraallo, warqado iyo weecaal, waxay baafisa ha sheegin wax sheegaya..
waxay ku dadaashey gabadhii Jarmal siday wiilkeeda yar u korsan laheyd, aayahiisa u dhisi laheyd, kaasoo kolkuu caqliyeystey, xoogsadayna ku dhaqaaqay dhowr mashruuc eebbana uu ku guuleysiiyey.. qaraarkii nolosha iyo qaxarkeediina ku daayeen..
27 sano kaddib ayaa waxaa dhacday inay habartii bukootay, waxay dareentay in geeri ay ku ag wareegi, tii allana ay foodda ku heyso, waxay warqad tijaabo kama dambeys ah ku dirtay boostadii ninkeedii Soomaaliyeed, dhowr cisho kaddib ayuu isagiina yimid, kolkuu arkey ayuu iska baroortey, u sheegay inuu kolkuu geeriyooday aabbahi helay waraaqaheedii oo idil iyo kuwa uu soo diray dhexdase laga soo celin jiray, Aabbahiisaasoo ka horjeeday fikradda arooskooda, waxuu weydiistay





cafis iyana ku tiri :-
- waxii tegay tiigsimaad ma leh. waxaan idinku ogahay adiga iyo wiilkaagan inaad dhibaha waqtiga wadajir kaga hortagtaan, iskaashina kaga gudubtaan.. ilaahna waxaan idinkaga baryi cimri dherer iyo caafimaad qab.. oraahdaa baana hadal ugu dambeysay.. dunidiina kaga jiidatay.. Aakhiro u jihaadday gabadhii Jarmal iyadoo leh sida uu faray ninkeedii Soomaaliyeed qireysana ashahaadda muslimka.
ilmadii inankaa iska dhalka ahaa iyo aabbahi webiyo wey jeexi kareen.. Habartii ayaa deeta la aasay, wiilkii iyo aabbahi ayaa isu haray, tashaday, waxay ku heshiiyeen in wiilku soo xaraasho wax allaale iyo waxii Jarmal uu ku lahaa inuu magaca ka beddalayo, Dowladda Hoose ee Muqdisho kaga diiwaan gelin doono magac cusub ahna 'Gama diid' sidaa ayey ku kala tageen..
Wiilkii waxuu xaraashay waxii uu Jarmal ku lahaa oo dhan, sida uu ugu soo guuro dhulkiisa dhabta ah ee aabbe.. ha yeeshee isagoo ku jiro howlahii xaraashka xoolaha uu Jarmal ku lahaa yaa waxaa soo gaarey dhambaal ah in aabbahina dhintay, si dhaxalkiisa uu u la wareegana laga doonayo inuu degdeg dalka ku soo galo...
sidaa buuna hadda Soomaaliya ku joogaa. cabbaar buu aamusay, aamuskii ayuu ku sii fogaadey.. kaddib ayaa waxay Deeqa tiri:
- haye, ?!
- deetana waxba, Gama diid wuu ku hor fadhiyaa, waana midkaad Werenbag u taqiin, maantana dad iyo xigto oo idil aad adigu u tahay.. intay yaabtay Deeqa ayey tiri :-
- waa qiso murgo leh runtii, nolosha oo dhan baase ah silsilad taxan oo mashaakiil ah, yaase rumeysan in maalintii isugu kaaya horreysay dareenkaa i galay..
saacaddu ayuu dhugtay Gama diid mise waa 11:00 intuu soo kaxeeyey Deeqa ayuu gurigeedii keenay.. isla baarka ku ballameen habeenkii xigay.. Habeenkii xigay bay isla baarka ku kulmeen oo ay ku ballameyn.. sheekooyin wacan ayey isku weydaarsanayeen, waxuu Gamadiid kaga qisooday farqiga weyn ee u dhaxeeya Germany iyo Soomaaliya sida uu u kala arkay maalmaha yar ee uu joogay. waxuu war bixin ka siiyey waxyaabo faro badan oo yaab leh dalkayagase aan laga aqoon.
sheekadii ayaa isa soo xirtay.. waxuu dareemayey Gamadiid in wax un ku dhaceen kulankoodii Germany gadaashi inay u xog warranto ayuu weydiistay .. iyaduna si tifaftiran ayey sheekadii dhabteeda iyo



tafaashiisheediiba ku siisay.. iyo arrimahii ku soo biiray oo la soo gudboonaaday waayahan dambe. kaga warrantay siday Diintu iyo bulshadaba u qabaan inayan xiriiri karin, maadaama aan ku xirnahay ayey tidhi nin kale ooridina ahay.. kaasoo illaa iyo haddadan aynu joogno nolol iyo geeri midna aan lagu ogeyn.
Gamadiid baa waxuu dabadeed yiri :-
- Bulshada ma waxay qabtaa, diintuna dhigi inay kala waddo labo qofoo hal qalbi qudh ah wadaaga, dareen keliya wada leh. laba kala tegi karase ma nahay.
Cabbaar ayuu aamusay, ilmo ayaa labadiisa indhood ku soo joogsady Deeqa ka naxday muuqaalka uu qaatay, deetana hadalkii sii watay isagoo leh :-
- May.. suura gal ma ah inaynu kala tagnaa ma ay dhici kadho.. waa inaynu xal helnaa.. qiimahay ku fariisataba.. Sidaa buu gurigeedii kula yimi, gooray saacad dambe aheyd, deetana hoteelkiisii u sii sharaacday.

Deeqa hurdo ayaa ka soo dhici weyday feker daraaddi, arrin waxay qaadaa dhigeysay siday aadamiga oo idil u yihiin kubbad ay hadba maqaadiirtu dhinac u ganeyso.. iyo farqiga u dhaxeeya jaceylkii dhab ahi iyo kii dhalanteed ah.. afkaarta noocaa ah iyadoo ku jidha baa waxaa yeeray jaraskii taleephonka, saacadda ayey dhugatay mise waa 4:00 saq dhexe, waaba yaabe,, allow sahalse aamuuraha.. Deeqa ayaa hoos iska tiri. waxaa qabtay walaalkeed Yoonis waxuu u heystey inay huriddo, waxay maqashay isagoo leh:-
- ma Somali Airlines baa? waxaa ila habboon inaynu arrintaa murugada leh gaarsiinno berrito, si ay caawa hurdadeeda u hesho. jiifkuna kaga qasmin. Mahadsanadin, waa uuna iska dhigay samaacaddii..
Deeqa ayaa ka soo baxday qolkeedii, wuu rumeysan kari waayey walaalkeed saacaddan dambe ayey soo jeedday.. waxuu weydiiyey inay xanuunsan tahay iyo in kale .. iyana waxay ugu warcelisay xanuun aan aheyn inaan warkaa taleefonka ku yimi helaa ma jiro.. wuu ka meermeereystay, iyana way ku adkeysatay inay hesho, mar dambe ayuu waxuu yiri kolkuu sinnaba ugu dhaadhicin waayey inay iska seexataa si uu aroortii uu ugu warramo:
- Geeridu waa xaq iyo irrid qof waliba uu waqtigiisa gali.. waxaa isku dhacay labo diyaaradood oo ay mid taayada aheyd, waxaana ku geeriyooday, dhowr iyo konton qof saarnaa raxmad eebbe korkooda ha




ahaatee oo ay Luuleey naxariista janno ha ka waraabtee, adna samir iyo iimaan, ka mid aheyd...

Wow iyo wareydii Deeqa ka yeertay ma aheyn wax la safeyn karayo, boohintii iyo qeyladii ka dhacday deriskii oo idil baa isugu soo baxay, markay ogaadeenna, qof waliba waxuu ka tegay oo ka baxay gurigaa isagoo ashahaadanaya lehna:

- innaa lillaahi wa innaa ileyhi raajicoon..Luul waxay ahayd gabar aad u dabci fiicneyd toddobaad kaddib bayna aqal geli laheyd.

Deeqa subaxii hore ayey tegtay shirkadda iyadoo ay ka muuqato urugo erayo lagu sifeeyaa ayan jirin, dhafar iyo soo jeed xiriir ah ayaa indhaheedii laga akhrisan karayey, la moodayeyna caasaan ka batay daraaddi xinjiro dhiig ah sidood.

Waa loo wada tacsiyeeyey, xiriirkii fogaa ee ka dhexeeyey awgi, waxayna ku yiraahdeen:

Luul waxay aheyd saan dhaqaaqdey, si walbana wey mudneyd, geeriduna waa xaq ina wada sugi, dhinaca kale keligaa kaama dhiman giddigeen bey dunidan ciribta xun inooga jiidatay.. sabar baase loo baahan yahay..

Galabtii xigtay ayey Deeqa Gamadiid u tagtay wadajir aqalkii Luul u aadeen, reerahoodii ugu tacsiyadeeyeen, iyo inankii ay isku mehersanaayeen wada aqal geli lahaayeen toddobad kaddib.

Deeqa waxaa ka muuqday baqdin, cabsi iyo murugo weyn, waxuu ka rajeeyey Gamadiid inay adkeysi yeelato, waayaha ku qalloocday ayan dhinac u liicin, daruuftu adag ee la soo gudboonaadayna sabar iyo beer adeyg kaga gudubto.

Waxuu ugu qisooday mashaakillo daran ee isaga soo maray, haddii uu dacfi kala hortegi lahaa mowjad ay la tegi laheyd waalli uu ku dambeyn lahaa.. sheekooyinkaa waxay u suuro geliyeen Gama-diid inuu Deeqa si ahaan xaaladdeedii caadiga aheyd ku soo celiyo..

dabadeed, waxay ka ballameen arrimo badan, waayo labadoodaba safar ayey ahaayeen. Deeqa waaba soorto oo waa shaqadeeda socdaallada. Gamadiidana waxuu u socday Greece si uu u soo xiro , waxuu xisaab leeyahay qalabka iyo baddeecadda taallayna u xaraasho hanti waxuu ku lahaa magaaladaasi.. Subaxii xigay ayey garoonka ku kulmeen, si wanaagşan isu gacan qaadeen, isu soo noqod wacan ka alla baryeen..

Diyaaraddii ay Deeqa la socotay baa caga qaadatay, iyadoo ku jeedda magaalada Qaahira ee dalka Masaarida.. waxay shaqaalahii diyaaraddu 3 cisho oo aheyd muddadii laga hayey diyaaraddooda howl Makaanik la

dejiyey Hoteelka 'Sheraton' ee u dhow gegida dayuuradaha.

Labo kala bariday kala war la'baa la yiri. Deeqa farxad ayey ku joogtey Qaahira la xiriirtay muddadii loo qabtey inay isaga fasaqi kadho Dayib oo gabaadsi aheyd, 1 bil oo keliyana ay kaga harsantahay.
Gama diid oo u muujiyey inuu dad iyo duunyo adduun iyo Aakhiro iyada keliya ka fiirsanayo, dhinaca kale hawada Qaahiro oo ahayd mid khiyaali ah indho sarcaad leh qalbiga iyo indhahuba ay ku nuqsaan baxayaan, Deeqa xaaladda sidaa ah ayey ku jidhay.
Hooyadeedse wey ka duwaneyd taa ay gabadheedu Qaahiro la joogtay, maqsuudnimo iyo iyada wey kala fogaayeen, hor, gadaal iyo dhinac walba welwel ayaa ka xigsaday. keentay inay hadba gees ugu socoto xaglaha gurigeedii maxaase laab kacshay tolow? ileyskii mugdi ugu dooriyey? iyo madow aan wax laga arki karin?
Maxaa qalin cas ka saarey farxaddii? warqad gabadheeda ku socotay, shirkaddana kaga timi, kolkay akhrisayna ay ka shallaaydey, sababta ay u furtay?
maxaase ku yiil ? maxaa ku soo arooray dhambaalka?
arrin la xiriirta Daybi in war laga helay iyo warqad u soo diray oo uu kaga faalloday daruufahii qabsaday iyo dhibaatooyinkii helay iyo in intii uu daawada qaadanayey jecleystey inuusan qofna sirtiisa daalacsiin, wax xiriir ahna sameyn, hadda uu aad u ladnaadayna ku faraxsan yahay inuu mar labaad eheladii iyo asxaabtii la kulmo oo uu imanyo..
Xaawo Xasan waa hooyo, qalbi hooyana ninna idiin sheegi maayo, waxay ka fekertay, walaacna ku abuuray sida ay gabadheeda warkaa ku qaabbili kadho.
Deeqa ayaa timi, warkii heshay, kamase xumi ayey tiri inuu badbaaday, lana helaa, waayo waxaan ka doonayey waa furriin, kaddibna aan waddada isku weydaaranno. waxayse la yaabtay adduunkan iyo amuurahiisa.. waxay nafsaddeeda ku laheyd:-
Xigmadda ilaah uma baahna naqtiin, noloshuna waa ilaah sida uu u doonay.. Dayib ayaa yimi, Gamdiid baa waxuu damcay inuu la hadlo, Deeqaase ku tiri ha isugu keen tegin aniga ayaa isku dayi inaan si deggan uga dhammeysto, inkastoo aan waddo dheer u mari doono.. Dayib labadiisa naagood tii weyneyd reer tumasho iyo raaxo ayey noqotay, waxay u go doontay qaad iyo khamri sidaa daraadeed seddexdeedii ayuu siiyey kuna dalaaqay kolkuu yimi waxuu damcay inuu hagaajiyo



xiriirkooda isaga iyo Deeqa wayse ka diidday.
Deeqa siday amuuro mooddey ma noqon, Dayibna waxuu u sheegay in dalaaqad ay ka heshaa ay calaal timo lagu arkaa tahay.
Dacwo iyo ashtako ayaa ka dhex billowday, socotay muddo 1 bil ah, Deeqana waagii baryaba ay maxkamad u kallaheysay..
Dirqi iyo cadaadin dhinac walba kaga yimi, iyo dad ay xurmad iyo qaddarin isku lahaayeen awgeed buu ugu dambeyn oggalaaday inuu furaa sidaa ayuu cidla ugu soo dhacay, gabar kastana irridka kaga soo xiratay.

Waxay aheyd maalin Arbacaad waxaa go'ay afartii sano ee loo qabtay inay kaddib Deeqa iska fasaqi kadho Dayib waxayna aheyd maalintii ay furriinka ka heshay, qaddarkaa isku beegay, se soo if baxiisa dariiqaa adag iyo waddo qodxo miiran ah ayey marsiisay siday xurriyad u heli laheyd. Gama diid waxuu ku seexday habeenkaa in aroornimada hore ee maalinta khamiista kaco Dayib kulan la yeesho, qabow isugu dayo inuu kaga furo wax kastaba ha ku qaadatee..
Saacaddu kolkay aheyd 7:00 aroornimo ayaa aqalkii lagu soo garaacay illinka ayuu furay mise waa Deeqa, wey is nabaadsadeen, dabadeed ayuu waxuu yiri:-
- subax wanaagsan? kheyr ii sheeg ? iyo waxa cusub
- may labadan maalmood ayaan ku arag, marka waxaan is iri armuu xanuunsan ayahay.. haddana in yar oo aamus ah dabadeed :-
- bishaaro, tacab fara badan dabadi dalaaqadeydii ka helay, waana mahad ilaah anoo maanta madax bannaan
- yaah.. yaah.. la hubaa..
Surweelkii iyo shaarkii gacantiisii qabteen ayuu ku dhacay. ina keen.. ina kici.. adduunkoo idil u warinnee, magaalada oo dhan u tabinnee, masaakiinta idilkood saddaqo ka haqab tirnee.. alla maanta ayaanta iyo iidda wanaagsan ilaahii ina siiyey, isagaa ku abaal leh, wey ahaatey maanta si wanaagsan aynu u iidno.
- Deeqa -
- hee ?
- maantadan aroos ma galnaa ?
- may degdeggaa faraha badan looma baahna...

Waa inaad kolka hore waalidka si wacan isu barataan..
- eraygaaga baa un jiro Gacaliso..
Sidaa ayey magaalada ugu dageen, iyagoo cirka, dhulka, badda,

webiyada, dadka , duunyada, iyo nafley oo idil warkaa u tabin.
Labo bilood oo ay Deeqa reerkeedii aad ugu barteen Gamadiid, isuna dhex galeen, illaa uu wiilkoodii oo kale noqday ayaa soo wareegtay.
Waxaana dowr ka qaatay arrinitaa Shaafici oo kolkuu yimi reerka kaga qisooday qalbiga weyn ee Gamadiid iyo waxii abaal ahaa ee uu ugu gali jiray Germany.
Waxayna isla meel dhigeen in arooskooda lagu beego 26 Juun oo aheyd maalintii ay is barteen.. kaddib kolkay dhigteen xaflad nikaax oo dad yar ku koobneyd.
Deeqa shaqadii bay ka ruqseysatay, shirkaddiina xaq wacan sidaa ay ku siisay..
Farxaddooda iyada iyo Gamadiid mid la tilmaami karo ma ayan aheyn... ilaahna kaga mahad celin jireen nicmaddaa uu ku galladeystay.. waxay galeen tabaabushahii guurkoodii.. xilliga arooska ay dhigan lahaayeen oo ay ka dhimman tahay 15 cisho oo qura ayaa waxaa yimi Sardheeye oo hadiyado aan yareyn u siday Deeqa..
Warkeed ma hayn beryahii dambe oo dhan gaar ahaan kolkay cinaawiinteedii wada beddeshay... waxuu helay sheekadeedii, meeshii loogu sheegay ayaa miyir ugu dambeysay ... waxaa loo gudbiyey dhakhtarkii... waxuu habeen iyo maalin ku qarwi jiray Deeqa.. Deeqa... waxaa muuqtay inuusan helin warqaddii ay u dirtay..
Waxuu isbitaalka ka soo baxay dharaar Isniin, bishu Juun aheyd 26.

Waxay aheyd maalin dadka Soomaaliyeed ku weyn.. loo iidayey gobannimo.. ayaan waxay aheyd Ibliis, iyo insiga qaybta la wadaagta xirxirnaayeen, si ayan uga qasin farxadda ay maalintaa ayaamaha kale dadkeenna kaga gaar noqotay.. waxey aheyd maalin carruur iyo cirroolaba laga akhrisan karay foolalkooda farxad weyn.. maalintii layska rogay kabaddii gumeysiga.. nalal kala duwan ayaa gebigeedaba magaalada lagu qurxiyey, ka yeeshayna sida buur nuur ah aragti diirran leh oo aad u macaan.. Munaasabaddaa waxaa u dheeraa Deeqa iyo Gamadiid iyadoo ay aheyd habeenkii arooskooda, laguna qabanayey hoteelka Al-Curuuba.. Deeqa iyo Gamadiid midkoodba si gaar ah ayaa looga shaqeynayey, si fagaarahaa weyn ee Curuuba iyo biyaha korkooda uga soo muuqdaan iyagoo sida dayaxa dhalaalaya ah.. waxaa lagu casumay xafladdaa arooska dad aan yareyn, magaalada caan ka ah.. nalalka; ubaxa; alalaasta; heesaha iyo durbaanka waxay u dhacayeen kala





go laaan.. hawadaa macaan iyadoo lagu jiro baa waxaa soo galay Sardheeye, meel gees ah oo aan laga arkeyn ka daawanayey, qeyrki iyo intii xafladda joogtay waxay ka maqsuudsanaayeen miyuusigga iyo heesahii baxayey.. guuxii yeerayey.. iyo gurbaanka .. Sardheeye aad buu u gubanayey.. waran iyo torrey baa ku taagnaa.. isagoo sidaa ah bay waxay indhahiisa ku dhaceen Saafi iyo gabadhiisa Sucaad oo booska marti sharafta fadhiya.. ma ogeyn in xiriirka Deeqa labadaa qof ku xira uu ka weyn yahay kan walaalaheed.. il darradii iyo diiftii buu la dhuuntay, yeynan ku arkin is yiri... sidaa ayuu kaga soo baxay. waxuu Sardheeye hayey waddadaa 1 da Luuliyo isagoo ku dhawaaqayey erayo ay ka mid ahaayeen:-

Nolosha qiimaheed sheeg hadduusan jirin ruux jaceyl dhab ah kuu haya oo dhibaatadii kugu timaaddaba kula qaybsan ?

Ii sheeg macnaha jiriddu leedahay ujeeddo ka dambeysa haddayan jirin? Anfaca ididdiillo waa maxay qaayo iyo hadaf la'aan?

Miyeysan ku habbooneyn qof qalbi nadiif u ah, niyad jecel, ruux daryeela xooray inay isna nafta ka guurto? Gefkii aad sameysaa gadaal baa ka garataaye.. ee iska key cafi Saafiyey.. waxuu is weydiiyey wajiga uu ku qaabili karo Saafi iyo gabadhiisa Sucaad.. waxuu ku soo laabtay gurigiisii isaga oo ayan nafi ku jirin kana dhicin.

inay jirkiisii warammo ku taagan yihiin la moodsiin .. waad degdegtay.. waad fududaatay.. caqligii ka boodday.. waxay kala yihiin ma jirto, iyo waxay is dhaamaan Saafi iyo Deeqa.. sidee baadse degdeggaa ugu xoortay qof labo iyo labaatan sano jaceyl dhab ah ku hibeysay.. daacad ku aheyd.. iyadoo quruxdaa ilaah siiyey nin kale aan daymoon.. halgankii aad nolosha ugu jidhay kula barbar taagneyd..

Cunnadii ayuu deeta ka go'ay.. dadkii baa xasuustiisii ka tirmay.. dhakhtarkii ayuu mar labaad galay, muddo seddex bilood ah ku jiray.. illaa uu xoogaa soo yari roonaaday.. Dhakhaatiirtiina gaddoomisay in gurigiisa uu ku laaban karayo.. sida buu gurigiisa iskaabulada ahaa uu ugu soo noqday.. waxuu subax ka mid ah subaxyada is-weydiiyey waxa uu ula hadli waayey Saafi, kaga cudur daaran waayey dembigii uu ka galay, iyo Sucaad.. taleefonkii ayuu u garaacay, waxaa ka qabtay Saafi, baryo iyo eed sheegad ka badiyey.. iyana si kooban ha is daallin ku tiri, se haddaad dooni inaad Sucaad aragto. waad u imaan kartaa hase yeeshee waa inaad waqtigaad imaneyso soo hor sheegtaa.

Waxaa u soo galay Saafi markaa gabadheedii Sucaad oo kolkay ogaatay



in Aabbaheed uu hadlayo taleefonkii boobtay, iyadoo leh:-

– Baaba miyaana , ii warran aabbe, maxaad sidaa noogu gashay? aannu marna kaa filin? caafimaadkaaga ka warran ? maxay maalmahu kugu sameeyeen?

Sardheeye cod murugo iyo ciil ku dheehan, gariirayana ayuu waxuu ugu warceliyey:-

Ficil aan laga fiirsan, hadal aan laga fakarin, labadaba way kugu fogaadaan feerahaaga wax u dhimaane.. ee i cafiya maandheey adiga iyo hooyadaaba.

– Goormaa hadda aad noo iman aabbe?

– Waqtigaad doontaan,

– Waa tahay.. berrito ka warran 4.00 galabnimo.

– Waxba kama qabo.

4.00 galabnimo ee maalintaa Jimcaha aheyd, waxuu Sardheeye joogay villadii Saafi iyo gabadheeda Sucaad..Sardheeye iyo gabadhiisa waxay si tiiraanyo badan lagu subkay kaga sheekeysteen waxii soo wada maray, deeto ayaa waxaa u yimid Saafi, in yar kaddibna Sucaad ay labadoodii isaga siibatay.. waxuu u soo jeediyey inay u cudur daarto, fudeydkii ka cafiso, illowdo gefkiisa, iskuna noqdaan.. waxayse u sheegtay in taa ay calaacal timo lagu arkaa tahay..

Waxay ka codsatayna in kolkuu Sucaad u imanayo ku soo wargeliyo siday isugu firaaqeyso iyaduna maalintaa ay maalin joog u aaddo.

waxuu ka soo tagey gurigoodii isagoo dhulka uu la wareegayo.. indhaha aan waxba ka arkeyn.. cagaha ku socon la.

gacalkaa iyo gurigaa lama gaar maro waa tii hore loo yiri

Sardheeye waxuu ahaa sida ruux la kala gooyey.. sidaa bay nolsoshii isaga oo dá ah ugu xumaatay ... qof maciin ama dhibkaa ka kala fududee is tiri ma Jirin... waayo waxay aheyd godob uu isu geystay iyo waddo gacantiisa uu ku jeexday.

Deeqana maalmahii ka qalloocday ayaa mar labaad u toosay.. iyada iyo Gamadiidna waxay ahaayeen tusaale labo qof oo dhallinyaro ah afgarad wacan isku guursaday.. dabciga ma ayan laheyn dadkaa danta iyo maslaxadda isu keentay.. darajeyn iyo is daryeel ka simad iyo calaamad yeesheen.. qayb walba oo gurigooda ka mid ah ayaa ka marag kacayey wanaagga iyo sharaf ku wada noolaanshahooda.. waxay badi ku waaanin jidhay gabdhahaa saxiibbadeed ah aan weli guursan in hoggaanka weli gacantooda uu ku jiro, ka baaraan degaan guurkooda. fudeyd ka

dheereeyaan iyo fiirsho la'aan .. sabool har dhaqan wanaag kugu hareereeya dirinba ha kuu dhigee kun jeer uu dhaamo malqabeenkaa qiimiga nolosha aan kugu dareensiin karin afgarad wacan, xiiso aan dhammaan, wadi tashi joogta ah, halgan aad meel kaga soo wada jeeddaan, iyo dan qura oo mideysan, inay iska ilaaliyaan erayada malabeysan dhabtase aan xiriir la laheyn, aadna isaga hubiyaan.

waxay oran jidhay dadka xumi ragga iyo dumarkaba way ku jiraan. heerka ay doonaan bulshada ha ka ahaadeene sobool ama reer sed iyo raaxo.. sida daraaddeed waa inuu miisaan qofba kan kale saaraa, hubsadaa inuu yahay shimbirkii ay wada duuli kareen, si ay noloshooda xagga naarta ugu xaglin. is eedin maalin ay shallaytidu waxba u tareyn kolay soo raagtay oo ay waqtigeedii ka soo dibdhacday.. dantuna ku qasbin inay koodiyaan maalmo wada qallocan. ka kooban oo isagu jidha qeylo joogto ah, qaxar aan dhammaan, qaraar ba'an iyo qabow dugsi aan laheyn, rafaad aad ku dambeysaan talo aydan ruugin awgeed.

maxaynuse dhibaha badankood gacantayada ku abuurannaa!

DHAMMAD



Waxaa Lagu Daabacay 'Golden Pages Printing Press'

# BUUGGAN ...



Taleefonkii ayey isi saartay Deeqa, iyadoo dhoollacaddeyneysa guushaa ay soo hoyisay awgeed,way hubtay inay goolal badan ay ka soo hoyin doonto cayaarta, gacan sarreyn doontana labadeeda gelin, wey hubtay inay hadafka ay dooneyso iyo waxa ay damacsan tahay gacanta ku dhigi doonto, waayo waxay garaacday irrid sax ah, qoladan iyaga ah si kastaa ha u taag darraadeene waxay karaan waxaan la koobi karin awooddoodna leeyihiin.
Candhuuf yar ayey tuftay iyadoo ku leh sowd gibin ah samaceediina gaaray :-
- Kanina waa dhurwaa cusub, allow ina badbaadi haddaynu haween nahay.

Waxay ugu gashay cadceed sideed, nuurkeeda uu ka horreeyo, udgoonka la yiraahdana 'Madame' uu u waddo xaarayo, intuu yari xoogaa dhaafeyna billaabay inuu yeershaa buun ah ogeysiin in Malaäigi carriga soo gashay, udgoon dunida ku hareereysay, ileys, shucaac, iyo iftiinna ku dahaartay, jaceyl ku mug buuxisay.
Waxay xirnayd saako jilbaha ugu jooga, leh midabka shimbarahaa huruudda ah ee aroor waliba ka heesa geedaha korkooda, boorso ka sameysan Antiloob ceynadda ugu sarreysa, laguna dhayey midabka haafaanka, boorsadaasoo ka lulaneysay garabkeeda, kabo maqaar ah qurux iyo bilic ka muuqata, ku sigeysa cunid qayb kasta oo ka mid ah labadeeda cagood ee yar yar, shilis hareereeyay qoorteed dheer ee sida biriq dhaceysa hadba ganeysa nuur indhaha lagala baqo, suunka ku giijisanaa dhexdeeda waxuu ahaa dhameystir sare oo ka marag kacaya dooqeeda sare. jirkeeda tin iyo cirib ka dhaxowba waxaad moodi inay ku leeyihiin i cun oo i calaanji amaba sidaa baa ku qaban.
Deeqa waa soorto Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed qalanjo sare garaneysa waxay gasho iyo waxay guddo, garaneysa siday nafsad waliba higso ugu tahay iyo hillaac rajo geliya. Waxuu ka soo kacay kursigii uu ku fadhiyey , isi soo taageyna baratamahii xafiiska si uu u soo dhoweeyo xowral ceyntaa soo booqatay, isagoo ka birig birig siinaya labadhiisa indhood, bilicda hor taagan run iyo been midday tahayna kala raadin.

Waxuu mar la wada gariiray sadrigeeda buuxa, naasaheeda gamuunta gamaya, indhaheeda dabka baqtiin, kubabkeeda culus ee cayga loo daadin, giddigeed baa waxay aheyd sokor dareeri oo aad malabso is oran.

Waxuu ku yiri isagoo dhareer fakad ah ceshan, neeftuurayana:-
- Ahlan wasahlan Deeqa, Ahlan wasahlan, ha is martiyeen, minanka minankaagii waa .. waad ina sharaftay allaha ku sharfee.